# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Golaha Wakiiladda



## WARBIXINTA
## Wax-qabadka Sannadka 2022 ee Aqalka Golaha Wakiillada 5aad ee Somaliland

SOMALILAND HOUSE OF REPRESENTATIVES © 2022

Near Sha'ab Area, In-front of The Presidential Place
www.somalilandparliament.com
hor@somalilandparliament.net

HARGEISA-SOMALILAND

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**
**GOLAHA WAKIILADDA**

*********************************************

# WARBIXINTA WAXQABADKA SANNADKA 2022 GOLAHA WAKIILLADA 5AAD EE SOMALILAND

**January 2023**

# TUSMADA

HORDHAC. ....................................................................................................1

WAX-QABADKII KAL-FADHIYADA GOLAHA.................................................................. 2

WARBIXINADII GOLEWAYNAHA LAGA HOR JEEDIYAY SANNADKII 2022KII ............................2

MASHAARIICDA SHARCI (XEERARKA)...................................................................... 4

*B. Xeerarka Goluhu Ansixiyay ee Guurtida ku maqan*..................................................4

*T. Xeerarka Madaxweynaha u gudbay*............................................................................4

*J. Xeerarka Madaxweynaha u gudbay ee uu Dhaqangaliyay Sannadkii 2022*......................5

*X. Xeerarka Golaha horyaal*..................................................................................................5

MASUULIYIINTII QARAN GOLUHU ANSIXIYAY ............................................................ 5

MASUULIYIINTA QARAN EE GOLUHU SU'AALAHA WAYDIIYAY ..................................... 8

MOOSHINADII GOLAHA LA HORKEENAY ..................................................................... 8

ANSIXINTA ODOROSKA MIISAANIYADAHA QARANKA.................................................... 9

*Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022ka*..........................................................9

*Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2023ka*.......................................................... 10

ARRIMAHA KALE EE GOLUHU KA DOODDAY ................................................................ 11

GUDIYADA GAARKA AHAA ......................................................................................... 11

GO'AANADII GOLUHU GAADHAY SANADKII 2022KII .......................................................12

WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA ........................................................................*16*

1. *Gudidda Joogtada iyo Anshaxa*........................................................................ 16

*2.* *Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta*........................... *17*

*3.* *Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka*..................................................... *18*

*4.* *Guddida Arimaha Bulshad*.......................................................................................... *18*

*5.* *Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka*................................. *19*

*6. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada ........ 20*

*7. Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska. ........ 22*

*8. Guddida Arr. Dibadda, I. Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maal-gashiga ........ 22*

*9. Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada ........ 23*

*10. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaac. ........ 23*

QORSHE ISTARAATIJIYADEEDKA 5TA SANNO EE GOLAHA ........ 25

GUDOOMIYE OO MAGACAABAY AGAASIMAYAAL ........ 27

AQOON-KORODHSIYADII LOO QABTAY GUDIYADA GOLAHA ........ 27

DOORKII GOLAHA WAKIILLADA EE ABAARIHII DALKA ........ 29

SAFARADII DALKA DIBADDIISA LOOGU BAXAY ........ 30

WUFUUDIHII IYO MADAXDII KALE EE GOLAHA YIMI ........ 33

LIISKA TIXRAACYADA ........ 38

B) Ajandayaasha Kal-fadhiyadii Golaha ........ 38

T. Liiska Mudanayaasha Golaha Wakiillada ........ 39

J. LIISKA QAAR KA MID AH SHAQAALAHA GOLAHA WAKIILADA ........ 42

# ***HORDHAC.***

Xeer-dejinta dalku waxay ka mid tahay Saddexda tiir ee Qaranku ku qotomo, sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, kuwaas oo kala ah Xukuumada (Excutive), Garsoorka (Judiciary) iyo Xeer-dejinta (Legislation).

Golaha wakiilladu waa mid ka mida ah labada aqal ee Baarlamaanka Somaliland ka kooban yahay, kuwaas oo kala ah (Guurtida iyo Golaha Wakiillada) oo marka la isku darro loogu yeedho Xeer-dejin ama Baarlamaan. Golahan Wakiillada ee la soo doortay 31 May 2021 waa Golihii labaad ee ku yimaada qaab doorasho toos ah, waana Golihii $5^{aad}$ (afraad) oo ay ka horeeyeen afar gole, saddexda gole ee kale waxay ku yimaadeen hab-beeleed (xulasho). Afartaas Gole ee Golahan ka horeeyay waxay kala ahaayeen: -

- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay shirweynihii Burco **1991 - 1993** kana koobnaa **(111)** xubnood.
- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Boorama **1993-1997** kana koobnaa **(75)** xubnood.
- Golihii wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Hargeysa **1997-2005** kana koobnaa **(82)** xubnood.
- Golihii wakiilada ugu horeeyay shacabku si toos ah u soo doorto September 2005kii, **2005-2021** kana koobnaa **(82)** xubnood.

Golaha Wakiillada waajibaadkooda, tilmaamtooda Guud iyo Awoodoodu waa Xubno ka wakiil ah dadweynaha, waana qeybta $1^{aad}$ ee Xeer-dejinta iyo ogolaanshaha iyo Illaalinta Siyaasada Guud ee dalka lagu hagayo iyo sidoo kale ansixinta heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soo saarid ama wax-ka beddelid qaanuun iyo sidoo kale Ansixinta Wixii Maaliyad khuseeya oo ka mid yihiin ansixinta Miisaaniyada, Ogolaanshaha Cashuuraha, Assaasida Keydka Dhakhliga Somaliland, Daabacada Lacagta iyo habeynta nidaamyada dhaqaale iyo kuwa lacageed, Sida ku cad Qodobka $39^{aad}$, Qodobka $53^{aad}$, Qodobka $54^{aad}$ iyo Qodobka $55^{aad}$ ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Qaab-dhismeed-ka guud ee uu Golaha Wakiiladu leeyahay waxa u dheer inuu leeyahay Guddiyo u kala xilsaaran hawlo iyo shaqooyin kala duwan, waxanay ka kooban yihiin 10 Guddi Sida ku cad Xeer-hoosaadka Golaha Xeer Lr. 01/2021. Goluhu Sannadkii 2022kii wuxuu yeeshay saddex kal-fadhi oo ahaa kal-fadhigii 2aad, 3aad iyo 4aad, wuxuu kal-fadhiyadaas qabtay hawlo aad u muhiima sida Ansixinta Mashaariic Sharci, Ansixinta Masuuliyiin Qaran, Ansixinta Miisaaniyadaha qaran iyo hawlo kale oo aad u muhiima, Hadaba warbixintani waxaynu ku soo koobaynaa Wax-qabadkii Golaha ee Sannadkii 2022kii.

# WAX-QABADKII KAL-FADHIYADA GOLAHA

***Kal-fadhigii 2$^{aa}$, 3$^{aad}$ iyo 4$^{aad}$ ee Golaha 5$^{aad}$ ee Wakiillada Somaliland***

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Kal-fadhigii 2$^{aad}$ | 28 Fadhi |
| 2. | Kal-fadhigii 3$^{aad}$ | 21 Fadhi |
| 3. | Kal-fadhiga 4$^{aad}$ | 26 Fadhi |
| 4. | Kulamadii Gudiyada Golaha Wakiiladu yeesheeyn | 119 Kulan |
| 5. | **Isugaynta Fadhiyada iyo Kulamadii Gudiyada** | **194 Fadhi/kulan** |

## Warbixinadii Golewaynaha laga hor Jeediyay Sannadkii 2022kii

Waxa Sannadkii 2022ka Golaha laga horjeediyay 29 Warbixinood oo isugu jiray Warbiixnada Gudiyada, Warbixinada Xeerarka, Mooshino, Miisaaniyado, Xisaab Xidho iyo kuwa Masuuliyiin Qaran ay Golaha ka jeediyeen. Shaxdan hoose waxay muujinaysaa Nooca Warbixinta Golaha laga jeediyay, taariikhda la jeediyay iyo cidda jeedisay.

| Taariikhda | Nooca Warbixinta | Cidii akhridey |
|---|---|---|
| 02 January 2022 | Warbixinta Kormeerada Gobolada Dalka ee Gudidda Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka. | Md. Mustafe Axmed C/laahi Gud. Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka |
| 08 January 2022 | Warbixinta Xisaab XIdhka Miisaaniyadii 2020kii ee Gudidda Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka. | Md. Axmed Cabdi Ibraahim Xubin Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka |
| 15 January 2022 | Warbixinta Gudidda Dhaqaaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ee Odoroska Miisaaniayda Qaranka sanadka 2022ka | Md. C/rashiid Gud. Gudidda Dhaqaalaha |
| 16 January 2022 | Waxbixinta Guddida Arrimaha Gudaha ee Xeerka ka-hortaga iyo xakamaynta ka-ganacsiga iyo Tahriibinta Dadka. | Md. Axmed Nuur Guruuje Gud. Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 29 January 2022 | Warbixinta Guddida Cadaalada ee Xeerka Xaquuqda Caruurta. | Md. Yaxye C. Amiin Gud. Gudidda Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka |
| 05 February 2022 | Warbixinta Guddida Dhaqaalaha ee Xeerka Caymiska shirkadaha. | Md. C/rashiid Gudoomiyaha Gudidda Dhaqaaalaha |
| 15 May 2022 | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 2$^{aad}$ | Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle Xoghayaha Guud ee Golaha |
| 15 May 2022 | Warbixinta Kal-fadhiga 2$^{aad}$ ee Gudidda Joogta iyo Anshaxa | Md. Axmed Cabdi Casoowe Gud. Ku-xigeenka Gud. Joogtada |
| 12 June 2022 | Warbixinta Guddida Dhaqaalaha ee Wax-ka-beddelka Xeerka dakhliga Cashuuraha Bariga. | Md. Axmed Maxmamed Hurre (Barkhad) Gud. Ku-xigeenka Gud. Joogtada |

| | | |
|---|---|---|
| **11 June 2022** | Warbixinta Wasaarada Gaashaandhiga iyo Ciidanka Qaranka | Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga iyo Taliyayaasha Ciidanka Qaranka |
| **19 June 2022** | Warbixinta Wasaarada Qorshaynta Qaranka | Md. Cumar Wasiirkii hore ee Wasaarada Qorshaynta |
| **19 June 2022** | Warbixinta Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta Sare | Md. Axmed Toronto Wasiirka Wasaarada Waxbarashada |
| **27 June 2022** | Mooshin ku saabsan Qoondaynta Cashuuraha Bariga. | Md. Jamaal Adan Diiriye. |
| **27 June 2022** | Mooshin ku saabsan in aan madaxweynuhu soo celin karrin masuuliyiinta aan helin codka kal-soonigada Golaha. | Md. Axmedkhaliif Jaamac |
| **8 September 2022** | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 3aad | Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle Xoghayaha Guud ee Golaha |
| **10 September 2022** | Warbixinta Gudidda Arrimaha Dibada | Gudoomiyaha Gudidd Md. Maxamed Jaamac Koodbuur |
| **10 September 2022** | Warbixinta Gudidda Dhaqaalaha iyo Maaliyada | Gudoomiyaha Gudidd Md. C/rashiid C/Laahi Muuse |
| **11 September 2022** | Warbixinta Gudidda Joogtada ee Kal-fadhigii 3aad | Md. Maxamuud Saalax Xubin Gudidda ka tirsan |
| **11 September 2022** | Warbixinta Xeerka Qaxootiga iyo Magan-galyo doonka ee Gudidda Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka | Gudoomiyaha Gudidd Md. Yaxye Araarse |
| **11 September 2022** | Warbixinta Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada | Gudoomiyaha Gudidd Md. Axmed Nuur Yuusuf Guruuje |
| **12 September 2022** | Warbixinta Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka | Gudoomiyaha Gudidd Md. Mustafe Axmed C/laahi |
| **18 September 2022** | Warbixinta Gudidda Arrimaha Bulshada | Md. Axmed Khaliif Xubin Gudidda ka tirsan |
| **18 September 2022** | Warbixinta Gudidda Deegaanka | Gudoomiyaha Gudidd Md. Mubaarik Muuse Ismaaciil |
| **18 September 2022** | Warbixinta Xildhibaano Safar shaqo ku tagay Dalka UK | Abiibakar Siciid Cali |
| **19 September 2022** | Mooshinkii Wax ka badelka Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Codbixiyayaasha | XIldhibaan Eng. Axmed Cabdi Ibraahim |
| **19 September 2022** | Mooshinkii Wax ka badelka Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada | XIldhibaan Eng. Axmed Cabdi Ibraahim |
| **31 October 2022** | Warbixinta Miisaaniyada Qaranka 2023 | Dr. Sacad Cali Shire |

| | | |
|---|---|---|
| **27 November 2022** | Warbixinta Xisaab Xidhka Miisaaniyadii 2021kii ee Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka | Gudoomiyaha Gudidd Md. Mustafe Axmed C/laahi iyo Md. Eng. Axmed Ibraahim Xubin Guddidda ah |
| **28 November 2022** | Warbixinta wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Dakhliga Guud ee Gudiddii gaarka ahayd ee loo saaray. | Md. Maxamed Xasan Siciid Gudoomiyaha Gudidda gaarka ah iyo Md. Eng. Axmed Ibraahin |
| **29 November 2022** | Warbixinta Gudidda Dhaqaalaha iyo Maaliyada ee Odoroska Miisaaniyada Sannadka 2023ka | Gudoomiyaha Gudidd Md. C/rashiid C/Laahi Muuse |

# Mashaariicda Sharci (Xeerarka)

Sannadkii 2022kii Goluhu Wuxuu ka shaqeeyay Xeerar badan, kuwaas oo intoodba badan Goluhu Ansixiyay, iyadoo qaarkood Dhaqangaleen, qaarna marayaan akhriskii 3$^{aad}$ oo Golaha Guurtida ay u gudbeen, , sidoo kale qaar labada Goleba ansixiyeen Madaxweynaha u gudbiyeen uu soo celiyay.

Hadaba shaxan hoose ayaa lagu muujiyay Xeerarkaas Goluhu Ansixiyay iyo marxalada ay marayaan.

### B. Xeerarka Goluhu Ansixiyay ee Guurtida ku maqan

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda | Halka loo gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Xeerka Xakameynta ka Ganacsiga iyo Tahriibka Dadka | 24/01/2022 | Golaha Guurtida |
| 2. | Wax ka badelka Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Cod-bixiyayaasha | 19/09/2022 | Golaha Guurtida |
| 3. | Wax ka badelka Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada | 19/09/2022 | Golaha Guurtida |
| 4. | Xeerka Qaxootiga iyo Magan-galyo Doonka | 15/10/2022 | Golaha Guurtida |
| 5. | Xeerka Macdanta Qaranka | 16/11/2022 | Golaha Guurtida |

### T. Xeerarka Madaxweynaha u gudbay

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda | Halka loo gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Xeerka Sahminta iyo Soo saarista Shidaalka | 18/01/2022 | Madaxweynaha |
| 2. | Xeerka Shaqaalaha Dawlada | 16/02/2022 | Madaxweynaha |
| 3. | Xeerka Ka-hortaga iyo Xakamaynta ka-ganacsiga dadka | 19/06/2022 | Madaxweynaha |
| 4. | Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruuraha | 11/09/2022 | Madaxweynaha |
| 5. | Xeerka Shirkadaha Caymiska | 31/10/2022 | Madaxweynaha |
| 6. | Wax ka badelka iyo kaabista Xeerka Dakhiga Guud | 28/11/2022 | Madaxweynaha |
| 7. | Xisaab Xidhka Miisaaniyadii sanadka 2021 | 27/11/2022 | Madaxweynaha |
| 8. | Odoroska Miisaaniyada a sannadka 2023ka | 28/11/2022 | Madaxweynaha |

### J. Xeerarka Madaxweynaha u gudbay ee uu Dhaqangaliyay Sannadkii 2022

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Sahminta iyo Soo saarista Shidaalka | 13/02/2022 |
| 2. | Xeerka Shaqaalaha Dawlada | 01/03/2022 |
| 3. | Xeerka Ka-hortaga iyo Xakamaynta ka-ganacsiga dadka | 27/06/2022 |
| 4. | Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruurta | 29/10/2022 |

## Xeerarka Golaha horyaal

### B. Mashaariicda ee Gudiyaddu gacanta ku hayaan

| N | Magaca Xeerka | Gudidda gacanta ku heysa |
|---|---|---|
| 1. | Mashruuc Sharciga Dakhliga Shidaalka | Gudiddda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah |
| 2. | Mashruuc Sharciga Jidaynta kabka H. Gobolada Barri iyo Nidaaminta Cashuuraha Dawladda dhexe u qabato dawldaha hoose | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 3. | Mashruuc Sharciga Caasimada | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 4. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Duulista Hawada | Gudidda Hawlaha Guud |

### T. Xeerarka Guurtida ku maqan

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Halka loo gudbiyay |
|---|---|---|
| 1. | Wax ka badelka Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Cod-bixiyayaasha | Golaha Guurtida ku maqan |
| 2. | Wax ka badelka Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada | Golaha Guurtida ku maqan |
| 3. | Xeerka Qaxootiga iyo Magan-galyo Doonka | Golaha Guurtida ku maqan |
| 4. | Xeerka Macdanta Qaranka | Golaha Guurtida ku maqan |

### T. Xeerarka Gole Waynaha Horyaal

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Shirkadaha Caymiska | Madaxtooyada ka soo noqday |
| 2. | Xeerka Dakhliga Guud | Madaxtooyada ka soo noqday |

## Masuuliyiintii Qaran Goluhu Ansixiyay

Intii lagu jiray Sannadkii 2022kii Kal-fadhiyadii Goluhu yeeshay wuxuu ku ansixiyay Masuuliyiin Qaran oo Xilal kala duwan oo loo magacaabay ogolaansho Goluhu u siiyay, waxayna Masuuliyiinta Goluhu Ansixiyay sannadkaas tiradoodu ahayd **46 Masuul** oo isugu jiray Wasiiro, Wasiiro ku-xigeen, Gudoomiyayaal Hay'addo, Komishanka Doorashooyinka iyo Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Axsaabta Siyaasada.

Sidoo kale, waxa Golaha codka kalsoonida ka waayay 6 xubnood oo 3 ka mid ahi ahaayeen Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Axsaabta Siyaasada, halka 3ta kal ahaayeen Komishanka doorashooyinka, laakiin dhamaan 6 xubnood mar labaad oo Golaha la horkeenay ayuu siiyay kalsoonida oo uu ansixiyay.

Liiskan hoose waxa lagu soo koobay Magacyada masuuliyiinta la ansixiyay sannadkii 2022kii, xilalkooda iyo taariikhda mid kasta la ansixiyay.

| No | Magaca Masuulka | Xilka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Axmed Adan Jaamac | Wasiirka Wasaarada Horumarinta Reermiyiga | 09/01/2022 |
| 2. | Cali Xasan Maxamed | Wasiirka Horumarinta Biyaha | 09/01/2022 |
| 3. | Cabdilahi Cabdiraman Aare | Wasiirka Horumarinta Maal-gashiga | 09/01/2022 |
| 4. | Cabdirisaq Xuseen Cali | Wasiirka Diinta iyo Awqaafta | 09/01/2022 |
| 5. | Cabdilahi Faarax Cabdi | Wasiirka Macdanta iyo Tamarta | 09/01/2022 |
| 6. | Rooda Jaamac Cilmi | Wasiir ku xigeenka Maaliyadda | 09/01/2022 |
| 7. | Cabdinaasir Cumar Jaamac | Wasiir ku Xigeenka Arrimaha Dibedda | 09/01/2022 |
| 8. | Cabdilaahi Xuseen Cilmi | Wasiir ku Xigeenka Arrimaha Guddaha | 09/01/2022 |
| 9. | Siciid Axmed Jibriil | Wasiir ku xigeenka Horumarinta Biyaha | 09/01/2022 |
| 10. | Cabdixakim Siciid Muuse | Wasiir ku xigeenka Waxbarshada | 09/01/2022 |
| 11. | Maxamed Cabdilahi Guuleed | Guddoomiyaha Guddida Qandaraasyada | 09/01/2022 |
| 12. | Khaalid Jaamac Axmed | Guddoomiyaha H. Shaqaalaha Dawlada | 09/01/2022 |
| 13. | Saleban Cawad Cali Bukhaari | Guddoomiyaha Hay'adda Caymiska | 09/01/2022 |
| 14. | Cali Cabdilahi Daahir | Guddoomiyaha Banka Dhexe | 09/01/2022 |
| 15. | Aamina Xuseen Maxamuud | Guddoomiye ku xigeenka H. Shaqalaha | 09/01/2022 |
| 16. | Axmed Xasan Ibraahim | Xubin Komishanka Maamul Wanaaga ah | 10/01/2022 |
| 17. | Cabdiraxman Cali Cabdi | Wasiir Ku-xigeenka W. Warfaafinta | 10/01/2022 |
| 18. | Dr. Ciise Cabdiraxman Kayd | Wasiirka W. Arr. Dibada | 11/01/2022 |
| 19. | Cabdirisaaq Ibraahim Ataash | Wasiirka W. H. Jidadka iyo Gaadiidka | 15/01/2022 |
| 20. | Maxamed Xaaji Cismaan | Wasiirka Wasaarada Beeraha | 18/01/2022 |
| 21. | C/caziiz M. Xaashi (Cago-weyne) | G/kuxigeenka Gudida Qandaraasyada | 24/01/2022 |
| 22. | Maxamed Xasan Ismaciil | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 23/05/2022 |
| 23. | Muxiyadii Yuusuf Ibraahim | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 23/05/2022 |
| 24. | Aadan Geedi Qayaad | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 23/05/2022 |
| 25. | Cabdale Ibraahim Maxamed | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 23/05/2022 |
| 26. | Mukhtaar Cabdi Jaamac | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 06/06/2022 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 27. | Siciid Maxamed Cilmi | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 06/06/2022 |
| 28. | Maxamuud Axmed Obsiiye | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 06/06/2022 |
| 29. | Cabdirisaaq Ibraahim Maxamed | Wasiirka W. H. Jidadka iyo Gaadiidka | 13/06/2022 |
| 30. | Xuseen Cabdi Badhaani | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |
| 31. | Ibraahim Aadan Cali | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |
| 32. | Faadumo Ismaaciil Cabdi | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |
| 33. | Cabdicasiis Xiris Warsame | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |
| 34. | Muuse Xasan Yuusuf | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 06/09/2022 |
| 35. | Axmed Yuusuf Maxamed | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 06/09/2022 |
| 36. | Axmed Cismaan Xasan | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 06/09/2022 |
| 37. | C/qaadir Iimaan Warsame | Wasiirka Wasaarada Beeraha | 04/10/2022 |
| 38. | Dr. Axmed Aadam Buuxane | Wasiirka Qorshaynta Qaranka | 04/10/2022 |
| 39. | Mukhtaar Maxamed Cali | Gudoomiyaha Hay'adda Dhawrista Tayada | 04/10/2022 |
| 40. | Guuleed Muuse Galaal | Gudoomiyaha Hay'adda Caymiska | 04/10/2022 |
| 41. | Maxamed Xuseen | Gud. Ku-xigeenka Hay'adda Caymiska | 04/10/2022 |
| 42. | Maxamuud Jaamac Warsame | Wasiir ku-xigeenka Hawlaha Guud & Guryaynta | 04/10/2022 |
| 43. | Maxamuud Jaamac Warfaa | Wasiir ku-xigeenka X. Xoolaha iyo Kalluumaysiga | 04/10/2022 |
| 44. | Siciid Xasan Habane | Wasiir ku-xigeenka W. Warfaafinta | 04/10/2022 |
| 45. | Xamse Cabdi Ibraahim | Wasiir ku-xigeenka H Dhawrista Tayada | 04/10/2022 |
| 46. | Siciid Xasan Habane | Wasiir ku-xigeenka Shaqo-galinta & A. Bulshada | 04/10/2022 |

**Masuuliyiintii Qaran ee aan helin Codkii kalsoonida Golaha**

| No | Magaca Masuulka | Mawduuca Su'aalaha | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Mukhtaar Cabdi Jaamac | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 06/06/2022 |
| 2. | Siciid Maxamed Cilmi | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 06/06/2022 |
| 3. | Maxamuud Axmed Obsiiye | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 06/06/2022 |
| 4. | Muuse Xasan Yuusuf | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 06/09/2022 |
| 5. | Axmed Yuusuf Maxamed | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 06/09/2022 |
| 6. | Axmed Cismaan Xasan | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 06/09/2022 |

## Masuuliyiinta Qaran ee Goluhu Su'aalaha waydiiyay

Masuuliyiinta Golaha hor yimi si Mudanayaashu su'aalo ugu waydiiyaan shaqada ay qaranka u hayaan, sannadii 2022kii Masuuliyiinta qaran ee Goluhu su'aalo waydiiyay waxay ahaayeen 5 Masuul, waxayna kala ahaayeen.

| No | Magaca Masuulka | Mawduuca Su'aalaha | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga | Shaqada iyo Hawlaha Wasaaradu Qaranka u hayso | 11 June 2022 |
| 2. | Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaranka | Shaqada iyo Hawlaha Wasaaradu Qaranka u hayso | 19 June 2022 |
| 3. | Wasiirka Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta Sare | Shaqada iyo Hawlaha Wasaaradu Qaranka u hayso | 25 June 2022 |
| 4. | Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka Axmed Yuusuf Diri | Xisaab Xidhka Miisaaniaydii 2021 | 01/11/2022 |
| 5. | Wasiirka W. H. Maaliyada Dr. Sacad Cali Shire | Odoroska Miisaaniyada 2023 | 15/11/2022 |

## Mooshinadii Golaha la horkeenay

Sannadkii 2022kii Kal-fadhiyadii Goluhu yeeshay waxa Mudanayaal kala duwan ay Golaha horkeeneen Mooshino kala duwan, mooshinadaas oo nuxurkoodu ahaa Goluhu in go'aan ka gaadho ujeeddada sharci ee Mooshinadaas kala xambaarsanaayeen, hadaba, shaxdan hoose waxaynu ku soo koobanaynaa mooshinadii Golaha la hor keenay, nuxurkoodii iyo sidoo kale kuwa ansaxay iyo kuwaa aan ansixin sharci ahaan:-

| Taariikhda | Nuxurka Mooshinka | Cidda akhriday | Taladii sharci | Ansixintii |
|---|---|---|---|---|
| **22/06/2022** | Mooshin ku saabsan Curin Xeer cusub oo ah Xeerka Saxaafada Somaliland | Md. Barkhad Jaamac Batuun | Sharci ahaan ma ansixin | Nuxur ahaan wuu buray |
| **27/06/2022** | Mooshin ku saabsan Qoondaynta Cashuuraha Bariga. | Md. Jamaal Adan Diiriye. | Wuu Ansaxay | Looma Cadayn |
| **27/06/2022** | Mooshin ku saabsan in aanu Madaxweynuhu ku soo celin masuuliyiinta aan helin codka kal-soonigada Golaha. | Md. Axmedkhaliif Jaamac | Wuu Ansaxay | Looma Cadayn |
| **19/09/2022** | Mooshinkii Wax ka badelka Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Codbixiyayaasha | XIldhibaan Eng. Axmed Cabdi Ibraahim | Wuu Ansaxay | La-ansixiyay Guurtidana loo gudbiyay |
| **19/09/2022** | Mooshinkii Wax ka badelka Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada | XIldhibaan Eng. Axmed Cabdi Ibraahim | Wuu Ansaxay | La-ansixiyay Guurtidana loo gudbiyay |

## Ansixinta Odoroska Miisaaniyadaha Qaranka

### ➢ Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022ka

Sida Ku Cad Dastuurka Qodobkiisa 55aad Ogolaanshahah, dib u eegideeda, wax ka badalida iyo ansixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka waxa awood buuxda uu dastuurka iyo xeerarka kale dalku u siiyeen Golaha Wakiillada, waxaana odoroska Miisaaniyadeedka sannadkasta soo diyaarisa Wasaarada Horumarinta Maaliyada, ka dibna waxa soo ansixiya Golaha Xukuumada intaanu Madaxweynuhu Golaha u soo gudbin, marka Madaxweynuhu soo gudbiyo ayay Wasaarada Horumainta Maaliyadu warbixin buuxda ka siisaa Golaha, isla markaana Mudanayaasha Goluhu su'aalaha ay qabaan waydiiyaan Wasiirka iyo Masuuliyiinta Wasaarada Maaliyada.

Hadaba, Odoroska Miisaaniyad sannadeedka 2022ka waxa Golaha loo soo gudbiyay 27 December 2021, waxaana Golaha Warbixin ka siiyay **Wasiirka Wasaarada H. Maaliyada Dr. Sacad Cali Shire**, sidoo kale mudanayaal tiro badani su'aalo ka waydiiyeen, Wasiirka iyo Saraakiisha kale ee Wasaaradiisuna uga jawaabeen Mudanayaasha. Iyadoo intaas ka dib, sida Xeer-hoosaadku dhigayo Hab-raaca miisaaniyada Golaha Wakiiladu uu yahay, waxa si toos ah Miisaaniyada loogu wareejiyay Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga si ay u soo lafa-gurto, ka dibna, warbixin ugu soo siiso Golewaynaha.



*Wasiirka W. Horumarinta Maaliyada iyo Saariiksha Wasaaradaas oo Golaha Warbixin ka siinaya Miisaaniyada Sanadka 2022*

Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ee Goluhu waxay ka soo shaqaynaysay Miisaaniyada muddo laba toddobaad ah, waxayna kala duwan la soo yeelatay qaybaha kala duwan ee khusayso ama ay u aragtay inay wax ka waydiiso sida Wasaarada H. Maaliyada iyo hay'addo kale oo dawladeed iyo hay'addo gaar ahba, isla markaana la tashiyo badan iyo falanqayan balaadhan ku soo samaysay Miisaaniyada iyo madaxyada ay ka kooban tahay.

**15 January 2022** ayay Gudiddu Warbixn dheer oo aad u qiimo badan Golaha ku soo celisay, warbixintaas oo xambaarsanayd wax ka badal iyo kala wareejin madaxyo iyo madax-xigeeno Miisaaniyada ah.

Warbixintaas ka dib, wuxuu Golaha Wakiilladu 15 June gudo galaya inuu ka guto waajibaadka shaqo ee uga hadhsan Miisaaniyada, waxayna Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha Goluhu isla

qaateen in Miisaaniyada lagu ansixiyo wax ka badalka iyo kaabista ay Gudidda Dhaqaaluhu soo jeedisay.

Intaas ka dib, wuxuu Goluhu Cod aqlabiyad ah ku Ansixiyay Odoroska Miisaanad Sannadeedka 2022ka oo wax ka badal aad u badan lagu sameeyay, waxayna ahayd wax ka badalkii iyo kaabistii ugu waynayd uguna badnayd ee abid Golaha Wakiilladu ku sameeyo Mashruuc Sharciyadii Miisaaniyad sannadeed ee Xukuumadu u soo gudbisay, taas oo Goluhu uu **5 Madax** oo Miisaaniyada ka mid ah uu ka jaray lacag isugaynteedu dhan tahay **59,209,082,447/= SL Shilling,** isla markaana lagu kala kordhiyay **15 Madax iyo madax-xigeen** oo kala duwan kuwaas oo uga baahi badnaa Madaxyada laga soo jaray. Ugu dambeyn Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022ka oo Goluhu Madaxweynaha u gudbiyay **15 January 2022,** wuxuu Madaxweynuhu dhaqangalin ku sameeyay **17 January 2022ka** oo ahayd laba cisho ka dib markii Golaha Wakiilladu Ansixiyay.

### ➢ Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2023ka

Sidoo kale intii lagu jiray Sannadkii 2022ka, waxa Golaha la horkeenay Odoroska Miisaaniyad sannadeedka 2023ka taariikhdu markay ahayd **31 October 2022** waxaana isla maalintaas Golaha Warbixin ka siiyay **Wasiirka Wasaarada H. Maaliyada Dr. Sacad Cali Shire**, Iyadoo intaas ka dib sida Xeer-hoosaadku dhigayo isla markaana Hab-raaca Miisaaniyada Golaha Wakiiladu uu yahay, waxa si toos ah Miisaaniyada loogu wareejiyay Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga si ay u soo lafa-gurto, ka dibna, warbixin ugu soo siiso Golewaynaha.

**14 November** ayuu Goluhu Fadhi uu yeeshay su'aalo aad tiro badan oo khuseeya Odoroska Miisaaniyada 2023ga ay Mudanayaashu ku waydiiyeen, wasiirka iyo Saraakiisha kale ee Wasaaraduna dhamaan su'alahaas uga jawaabeen Mudnayaasha.



*Wasiirka W. Horumarinta Maaliyada oo Golaha Warbixin ka siiyay Miidaaniyada Sannadka 2023 iyo Ansixintii Golaha ee Miisaaniyada*

Ugu dambeyn, Gudidda Dhaqaalaha iyo Maaliyada Goluhu muddo badan oo naaqishaad iyo xog ururin ay ku samaysay Miisaaniyada isla markaana wixii su'aalo iyo xog ee ay u baahdeen waydiiyeen qaybaha ay khusaysay sida hay'addaha dawlada, waxay Warbixin balaadhan oo wax ka badel Odoroska Miisaaniyada ah Xambaarsan u soo gudbiyeen Golewaynaha 29 November 2022, warbixinta Gudidda ka dib, wuxuu Goluhu kala doortay in Dood la galiyo Miisaaniyada in wax ka badelka Gudidda Dhaqaalaha oo Golaha matalaysaa ku soo samaysay lagu ansixiyo isla fadhigaas.

Wuxuuna Goluhu isla gartay in fadhigii maalintaas lagu ansixiyo Miisaanad si waafaqsan Wax

ka badelka Gudidda Dhaqaaluhu ku soo samaysay Miisaaniyada, taas oo ay **20 Madax** laga jaray lacag Xadigeedu yahay **33,000,878,335/= SL Shilling**, lacagtaasna loo wareejiyay **17 Madax** oo kale kuwaas oo Goluhu u arkay inay uga baahi badan yihiin. Ugu dambeyn Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2023ka oo Goluhu cod aqlabiyad ah ku ansixiyay, wuxuuna u gudbiyay Madaxweynaha si uu dhaqangaliyo.

## Arrimaha kale ee Goluhu ka doodday

Sannadkii 2022kii waxa uu Goluhu ka doodday arrimo kale oo ku saabsanaa xaalada dalka, waxayna kala ahaayeen:-

1. Xaaladdii Abaarta Dalka ka jirtay oo Goluhu ka doodday taariikhdu markay ahayd 6 February 2022, dooddaas oo Goluhu ka soo saaray Qaraar ku saabsan Abaaraha, sidoo kalena Goluhu wuxuu taakulaynta Abaaraha kaga qayb galay lacag $50 kun oo dollar ah oo Gudoomiyaha Goluhu ku wareejiyay Gudidda Abaaraha heer Qaran oo Madaxweyne ku-xigeenku Gudoomiyaha u yahay.

2. Sidoo kale Goluhu wuxuu doodda dheer oo socotay mudd 4 fadhi ah ka yeeshay Xaalada Guud ee Dalka sida Abaaraha, Doorashooyinka iyo muranka siyaasadeed ee taagan, arrimaha dibada, sixir bararka, masiibadii dabka suuqa Waaheen iyo xaaladaha kale ee dalku halku marayo, dooddaas oo ay ka qayb-galeen 32 mudane, Goluhu wax go'aan ah kama soo saarin.

## Gudiyada Gaarka ahaa

Marka laga yimaado Gudiyada joogtada ah (Standding Commiittees) waxa kale oo jira Gudiyo gaar ah (Ad hoc Committee) Goluhu u saaro arrin markaa taagan si ay uga soo shaqeeyaan, iyadoo muddada shaqadoodu ku eegtay intay ku jiraan hawsha loo xilsaaray oo kaliya. Hadaba, wuxuu Gudoonka Goluhu magacaabay gudiyo gaar ah (ad hoc committees), kuwaas oo loo xilsaaray inay ka soo shaqeeyaan ka dibna Golaha uga soo talla-bixiyaan mawduuca shaqada loo xilsaaray, waxayna kala ahaayeen: -

1. Gudi gaar ah oo loo saaray soo diyaarinta iyo dhamaystirka Qorshaha shanta sano ee Golaha Wakiillada (HoR 5-years strategic plan 2022-2026)
2. Gudi gaar ah oo loo saaray inay ka soo shaqayso Xeerka Shirkadaha Caymiska oo Goluhu u baahday in dib loo soo naaqisho.
3. Gudidda Gaarka ah ee loo saaray Arrimaha Saxaafada iyo wada-shaqaynta Golaha Wakiilada.
4. Gudidda Gaarka ah ee loo saaray Wax ka badalka Xeerka Cashuuraha Bariga oo Golaha horyaala.

## Go'aanadii Goluhu gaadhay Sanadkii 2022kii

Saddexdii Kal-fadhi ee Goluhu yeeshay Sannadkii 2022kii wuxuu ku gaadhay go'aano kala duwan oo uu cod aqlabiyad ah ku ansixiyay, waxayna kala ahaayeen go'aanadaasi ansixinta Xeerar, Ansixinta Masuuliyiin Qaran, Ansixinta Miisaaniyado iyo Xisaab Xidho Miisaaniyadeed, Mooshino Golaha la horkeenay, tirada go'aanada uu gaadhay Goluhu sannadkaas waxay tiradoodu dhamayd **51 go'aan.** Shaxda hoose waxa lagu muujiyanayaa nooca go'aanka, taariikhda laga gaahay go'aanka iyo halka go'aankaasi u gudbay.

| No. | Go'aanka | T/la gaadhey | Halka loo gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo Tamarta Md. C/laahi Faarax Cabdi | 09/01/2022 | Madaxweynaha |
| 2. | Go'aanka Ansixnta Wasiirka Wasaarada Horumarinta Biyaha Md. Cali Xasan Maxamed | 09/01/2022 | Madaxweynaha |
| 3. | Go'aanka Ansixinta Gudoomiyaha Hay'adda Caymiska Md. Saleebaan Cawad Cali | 09/01/2022 | Madaxweynaha |
| 4. | Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Diinta Aw-qaafta Md. C/risaaq Xuseen Cali | 09/01/2022 | Madaxweynaha |
| 5. | Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Horumarinta Reer-miyiga Md. Axmed Aadan Jaamac | 09/01/2022 | Madaxweynaha |
| 6. | Go'aanka Ansixinta W. Ku-xigeenka Wasaarada Horumarinta Biyaha Md. Siciid Axmed Jibriil | 09/01/2022 | Madaxweynaha |
| 7. | Go'aanka Ansixinta W. Ku-xigeenka Wasaarada Arrimaha Dibada Md. C/risaaq Cumar Jaamac | 09/01/2022 | Madaxweynaha |
| 8. | Go'aanka Ansixinta W. Ku-xigeenka W. Horumarinta Maaliyada Marwo. Rooda Jaamac Cali | 09/01/2022 | Madaxweynaha |
| 9. | Go'aanka Ansixinta W. Ku-xigeenka W. Arrimaha Gudaha Md. C/laahi Maxamed Cilmi | 09/01/2022 | Madaxweynaha |
| 10. | Go'aanka Ansixinta Gudoomiyaha Bangiga Dhexe Md. | 09/01/2022 | Madaxweynaha |
| 11. | Go'aanka Ansixinta W. Ku-xigeenka W. Waxbarashada Md. C/xakiim Siciid Muuse | 09/01/2022 | Madaxweynaha |
| 12. | Go'aanka Ansixinta Gudoomiye ku-xigeenka Hay'adda Shaqaalaha Marwo. Aamina Xuseen | 09/01/2022 | Madaxweynaha |
| 13. | Go'aanka Anixinta Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawlada Md. Khaalid Jaamac | 09/01/2022 | Madaxweynaha |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Axmed | | |
| 14. | Go'aanka Ansixinta Xisaab Xidhka Miisaaniyadii 2020kii | 11/01/2022 | Madaxweynaha |
| 15. | Go'aanka Ansixinta Xubin Komishanka Maamul Wanaaga ah Md. Axmed Xasan Ibraahim | 10/01/2022 | Madaxweynaha |
| 16. | Go'aanka Ansixinta W. Ku-xigeenka Wasaarada Warfaafinta Md. C/raxmaan Cali Cabdi | 10/01/2022 | Madaxweynaha |
| 17. | Go'aanka Ansixnta Gudoomiye ku-xigeenka Hay'adda Camysika Md. | 09/01/2022 | Madaxweynaha |
| 18. | Go'aanka Ansixinta Gudoomiyaha Gudidda Qandaraasyada Qaranka | 09/01/2022 | Madaxweynaha |
| 19. | Go'aanka Ansixinta Wasiirka W. Arrimaha Dibada Md. Ciise Kayd | 11/01/2022 | Madaxweynaha |
| 20. | Go'aanka Ansixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sannadka 2022ka | 15/01/2022 | Madaxweynaha |
| 21. | Go'aanka Ansixinta Wasiirka W. Horumarinta Jidadka iyo Gaadiidka Md. C/risaaq Ibraahim Maxamed (Ataash) | 15/01/2022 | Madaxweynaha |
| 22. | Go'aanka Ansixinta Wasiirka W. Horumarinta Beeraha Md. Maxamed X. Cismaan Jaamac | 18/01/2022 | Madaxweynaha |
| 23. | Go'aanka Ansixinta Gudoomiye ku-xigeenka Gudidda Qandaraasyada Qaranka Md. C/casiis Cago-wayne | 24/01/2022 | Madaxweynaha |
| 24. | Go'aanka Ansixinta Xeerka Ka-hortaga iyo Xakamaynta ka Ganacsiga iyo Tahriibiinta Dadka | 24/01/2022 | G. Guurtida |
| 25. | Go'aanka Ansixinta Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruurta | 01/02/2022 | G. Guurtida |
| 26. | Go'aanka Ansixinta Xeerka Shaqaalaha Dawlada | 24/02/2022 | Madaxweynaha |
| 27. | Go'aanka Ansixinta Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka | 11/04/2022 | Madaxweynaha |
| 28. | Go'aanka Ansixinta iyo Diidmada Xubnaha Gudidda Diiwaangalinta Ururada Siyaasada iyo Ansixinta Asxaabta Qaranka | 25/05/2022 | Madaxweynaha |
| 29. | Go'aanka Ansixinta Xubnaha Gudidda Diiwaangalinta Ururada Siyaasada iyo Ansixinta Asxaabta Qaranka | 04/06/2022 | Madaxweynaha |
| 30. | Go'aanka Ansixinta Wasiirka W. Horumarinta Jidadka iyo Gaadiidka Md. C/risaaq Ibraahim Maxamed | 13/06/2022 | Madaxweynaha |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 31. | Go'aanka Ansixinta Xeerka Ka-hortaga iyo Xakamaynta ka Ganacsiga iyo Tahriibiinta Dadka | 13/06/2022 | Madaxweynaha |
| 32. | Go'aanka Ansixinta iyo Diidmada Xubnaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka | 20/06/2022 | Madaxweynaha |
| 33. | Go'aanka Ansixinta Xubnaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka | 06/09/2022 | Madaxweynaha |
| 34. | Go'aanka Ansixinta Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruurta | 11/09/2022 | Madxweynaha |
| 35. | Go'aanka Anxinta Wax ka badelka iyo kaabista Xeerka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada | 19/09/2022 | G. Guurtida |
| 36. | Go'aanka Ansixinta Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Guud iyo Cod-bixiyayaasha | 19/09/2022 | G. Guurtida |
| 37. | Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaranka Md. Axmed Aadan Buuxane | 04/10/2022 | Madxweynaha |
| 38. | Go'aanka Ansixinta W. Ku-xigeenka Wasaarada Shaqo-galinta iyo Arrimaha Bulshada C/majiim Ibraahim Muumin | 04/10/2022 | Madxweynaha |
| 39. | Go'aanka Ansixinta Gudoomiye Ku-xigeenka Hay'adda Caymiska Md. Maxamed Xuseen Axmed | 04/10/2022 | Madxweynaha |
| 40. | Go'aanka Ansixinta Wasiir Ku-xigeenka W. Warfaafinta Md. Siciid Xasan Habane | 04/10/2022 | Madxweynaha |
| 41. | Go'aanka Ansixinta Wasiir Ku-xigeenka Wasaarada Xanaanada Xoolaha iyo Kalluumaysiga Md. Maxamuud Jaamac Warfaa | 04/10/2022 | Madxweynaha |
| 42. | Go'aanka Ansixinta Gudoomiyaha Hay'adda Caymiska Qaranka Md. Guuleed Muuse Galaal | 04/10/2022 | Madxweynaha |
| 43. | Go'aanka Ansixinta Wasiir Ku-xigeenka W. Hawlaha Guud Md. Maxamuud Warsame Jaamac | 04/10/2022 | Madxweynaha |
| 44. | Go'aanka Ansixinta Gudoomiyaha Hay'adda Dhawrista Tayada Md. Mukhtaar Maxamed Cali | 04/10/2022 | Madxweynaha |
| 45. | Go'aanka Ansixinta Wasiir ku-xigeenka W. Horumarinta Beeraha Md. C/qaadir Iimaan Warsame | 04/10/2022 | Madxweynaha |
| 46. | Go'aanka Ansixinta Xeerka Qaxootiga iyo Magangalyo Doonka | 15/10/2022 | G. Guurtida |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 47. | Go'aanka Ansixinta Xeerka Shirkadaha Caymiska Qaranka | 30/10/2022 | Madxweynaha |
| 48. | Go'aanka Ansixinta Xeerka Macdanta Qaranka | 15/11/2022 | Madxweynaha |
| 49. | Go'aanka Ansixinta Xisaab Xidhka Miisaaniyad Sannadeedkii 2021kii | 27/11/2022 | Madxweynaha |
| 50. | Go'aanka Ansixinta Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Dakhliga Guud | 28/11/2022 | Madxweynaha |
| 51. | Go'aanka Ansixita Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sannadka 2023ka | 29/11/2022 | Madxweynaha |

# WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka, Kheyraadka Dabiiciga, wax soo saarka iyo Tamarta
4. Gudidda Arrimaha Bulshada
5. Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska
6. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
7. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta iyo Maal-gashiga
8. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca
9. Gudidda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Technologyada
10. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay Golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan. Hadaba, iyadoo Gudi waliba Warbixineeda Golaha ka hor akhrin doonta waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii Gudiyada oo kooban.

## 1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Guddida joogtada iyo Ashaxu iyada oo Gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga sida uu dhigaayo Qodobka 53aad iyo Awoodaha uu qeexayo Xeer hoosaadka Golaha Wakiilada Waxa ay Guddidu sanadkii 2022ka ay qabatay shaqooyin badan waxa ay kulamo la yeelatay Masuuliyiin kala duwan. Hadaba wax-qabadkii Gudidda oo kooban waxa uu ahaa sidan:-

Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaran

1. **12/03/2022** Gudoomiyaha Rugta Ganacsiga jsl
2. **14/03/2022** Guddida Kaalmaha Shidaalka
3. **17/03/2022** Guddida Gurmadka Abaaraha ee Heer Qaran (Madaxweyne ku xigeenka)
4. **26/03/2022** Gudoomiyaha Baanka Dhexe
5. **30/03/2022** Guddida Qaran ee Tacliinta sare jsl
6. **08/05/2022** Guddida Heer Qaran ee Gurmadka Suuqa Waheen.
7. **26/07/2022** Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Ganacsiga iyo Dal xiiska
8. **31/07/2022** Wasiirka Wasaarada Horumarinta Caafimaadka.
9. **02/08/2022** Guddida Dekedaha iyo Aaga Gancsiga ka Caagan
10. **14/8/2022** Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Is-bedalka Cimilada.
11. **15/8/2022** Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
12. **16/08/2022** Madaxda Xisbiyada Mucaaridka
13. **17/8/2022** Taliyaha Ciidanka Booliska
14. **17/12/2022** Xeer ilaaliyaha Guud ee Qaranka

15. **20/12/2022** Guddida Horumarinta Dhaqanka iyo Anshaxa Suuban ee Gobolka Maroodi jeex.
16. **27/12/2022** Ururka Mihnad-layaasha Caafimaadka

### Kormeeradii iyo Safaradii Gobolada ay Gudiddu ku tagtay.

**15-18/08/2022** Guddidu waxay isku qaybisay laba qaybood oo u kala baxay Gobolada Togdheer iyo Sanaag, halka qaybi ay Gobolka maroodi-jeex ka hawl-galeen si ay baadhitaan ugu samayso Banaan bixii 11 August 2022 khasaarihii ka dhashay iyo dhibaatadii ka dhalatay dadkii mudaharadka ku wax yeeloobay.

## 2. Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta

Guddida Deegaanku iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda Dastuuriga ah iyo Awoodaha uu qeexay Xeer hoosaadka Golaha Wakiilada, waxay Guddidu soo qabatay sanadkii 2022ka shaqooyin muhiim ah, sida Mashaariic Sharci, lafa-gurista Ansixin Masuuliyiin cusub oo Xukuumadda ka tirsan oo dhammaan ay u gudbiyeen Gole-waynaha.

### Kulamadii ay Guddidu la yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

1. **13/10/2022** MaCadka Cilmi Baadhista Beeraha
2. **19/10/2022** Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Khayraadka Biyaha
3. **03/02/2022** Hay'adda u diyaar garawga Aafooyinka iyo Keydka Raashinka Qaranka ee NADFOR.
4. **26/02/2022** Wasiirka Wasaaradda Xanaanada Xoolaha horumarinta Kalluumaysiga.

### Mashaariicda Sharci ee ay Guddidu u gudbisay Gole-waynaha

Waxay Guddidu ka shaqaysay Qabyo-qoraalka xeerka Macdanta Qaranka, kaas oo u qabatay Kulan hawleed ay ka soo qayb galeen dhammaan Daneeyayaasha Xeerkani. Ugu dambayn waxay Guddidu u soo gudbisay Xeerkan Gole-waynaha 15/11/2022.

### Masuuliyiinta Qaran ee ay Gole-waynaha uga soo talo-bixisay

1. **18/01/2022** waxay kasoo Talo-bixisay in xilka loo ansixiyo **Md. Cabdiqaadir Iimaan** Warsame, Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Beeraha
2. **18/01/2022** waxay kasoo Talo-bixisay in xilka loo ansixiyo **Md. Maxamuud Jaamac** Warfaa, Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo horumarinta Kalluumaysiga.
3. **18/01/2022** waxay kasoo Talo-bixisay in xilka loo ansixiyo **Md. Mukhtaar Maxamed** Cali, Guddoomiyaha Hay'adda Dhawrista Tayada.
4. **18/01/2022** waxay kasoo Talo-bixisay in xilka loo ansixiyo **Md. Xamse Cabdi Ibraahim,** Guddoomiye ku xigeenka Hay'adda Dhawrista Tayada.

### Safarkii ay guddidu ku tahay Gobollada Galbeed ee Somaliland

Guddida Deegaanka, Khayraadka Dabiiciga ah, Wax soo-saarka iyo Tamarta ayaa 06 ilaa 11 March 2022 Safar shaqo ugu kicitimay Gobollada Galbeed ee Somaliland sida Gabiley iyo Awdal, safarkaas oo daarrana xogogaal u noqoshada Xaaladaha Deegaan, Abaareed, Mashaariiceed iyo Shaqada ay Qaranka Wasaraadaha iyo Hay'adaha wadashaqaynta la leh Guddida. Safarkan ayaa wuxuu qaatay muddo Shan Cisho ah.

## 3. Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka

**16/11/2022** Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku waxay kulan xog-waraysi ah la yeelatay Guddoomiyaha Ban gigadhexe iyo saraakiil Bangiga ka tisan ku wehelinaysay kulankaas, iyadda oo u jeedadu ahaa inay Guddidu wax ka waydiiso sababaha Bangiga Dhexe u soo gudbin waayey warbixinta Xisaab-xdhika Bangiga dhexe iyo warbixinta guud ee dhaqaalaha dalka oo jideeyey xeerka Banka Dhexe Xeer Lr.54/2012.

**16/11/2022** Guddida Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranku waxay kulan xog-waraysi ah la yeelatay Wakaaladaha Biyaha ee magaalooyinka Burco, Boorama iyo Wasaarada Biyaha, iyada oo u jeedadu kulankaasi ahaainay Guddidu wax ka waydiiso sababaha xisaab-xidhka wakaaladaha Biyaha ka reebay warbixinta xisaab-xidhka 2021 oo ay ku jireen badi Hay'addaha Madax-bannaani.

**20/11/2021** Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku waxay kulan xog-waraysi ah la yeelatay Maareeyaha Wakaalada Biyaha Hargaysa, iyadda oo u jeedada kulankaasi ahaa inay Guddidu xogogaal u noqoto sababta Wakaalada Biyaha Hargaysa xisaab-xdihkeeda ugu gudbin wayday Xisaabiyaha Guud ee Qaranka si ay uga mid noqoto warbixinta Xisaab-xidhka 2021 ee Hanti dhawrku Golaha u soo gudbiyey.

**21/11/2022** Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku waxay kulan la yeelatay Hanti Dhawrka Guud ee Qaranka, iyadda oo u jeedada kulankaasi ahaa inuu Gudidda aah-faahin ka siiyo warbixintii xisaab-xdhika 2021 ee uu Golaha u soo gudbiyey Guddiduna ay gacanta ku haysay markaa, si ay Guddidu wax uga waydiiso meelaha faah-faahinta dheeriga ah uga baahdeen.

**26/11/2022** Guddida Ilaalinta Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku waxay kulan la yeelatay Xisaabiyaha Guud ee Qaranka iyo masuuliyiin ku wehelinaysay kulankaas. Waxayna ujeedada kulankaasi ahaa xogogaal u noqoshada sababaha hay'addaha madax-bannaan qaarkood loogu soo dari waayey ama loo soo raacin waayey xisaab xidhkooda warbixinta guud ee xisaab-xidhka 2021.

**27/11/2022** Waxa Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku ay Golaha u soo gudbisay warbixin ay Gudiddu ka diyaarisay xisaab-xidhka 2021, iyada oo Guddidu warbixinta ku soo lifaaqday soo jeedimo iyo go'aano ay Golaha uga soo jeedisay takaaliifaha aan sharciga ahayn oo ay Hay'addaha ama Wasaaradaha qaarkood qaadaan, iyada oo ugu dambeyn go'aan gole lagu laalay takaalifahaas aan sharciga waafaqsanayn ee Gudiddu soo jeedisay in la laalo.

## 4. Guddida Arimaha Bulshad

Guddida Arrimaha Bulshadu iyaga oo Gudanaya Wajibaadkooda Waajibaadkooda Dastuuriga ah iyo Xeer Hoosaadka Golaha Wakiilada oo Qeexaya Awoodaha Guddiyada Golaha wakiilada, Waxay Guddidu Qabatay Hawlo Muhiim ah sida:-

### Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

**15-oct -2022,** Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha Wakiilada JSL Kulan Xogwareysi la Qaadatay Wasiirka Wasaarada Waxbarashada & Seyniska.

### Kormeeridii & Safaradii ay ku Tagtay Gobolada Galbeedka

1. **26-03-2022** Waxay Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha wakiilada JSL kulan Xog-wareysi iyo kormeer ku tageen Gobolka Gabiley
2. **27-03-2022** Waxay Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha wakiilada JSL kulan Xog-wareysi iyo kormeer ku tageen Gobolka Awdal
3. **29-03-2022** Waxay Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha wakiilada JSL kulan Xog-wareysi iyo kormeer ku tageen Gobolka salal

### Kulamada Cabashada Dadweynaha

1. **21-03-2022** Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha Wakiilada JSL waxay kulan ku Qaabileen macalimiin ka Cabanayey Wasaarada Waxbarshada & Seyniska.

2. **22-10-2022:** Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha Wakiilada JSL ayaa kulan la Yeelatay Ururka Macalimiinta Jamhuuriyadda Somaliland.

### Masuuliyiinta Qaran ee ay Gole Weynaha uga soo Talo-Bixisay

1- **20-09-2022** Wasiir ku Xigeenka Wasaarada Arrimaha Bulshada, Qoyska iyo shaqaaleysiinta **MD: Cabdimajid Ibrahim Warfaa**

2- **20-09-2022** Wasiir ku Xigeenka Wasaarada Warfaafinta, Wacyigalinta iyo Dhaqanka : **MD: Siciid Yusuf Habane**

## 5. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

Guddida Garsoorka iyo Cadaaladu iyaga oo Gudanaaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo Awoodaha uu u qeexay Xeer hoosaadka Golaha Wakiiladu, waxa ay sanadkii 2022ka ay qabatay shaqooyin muhiim, sida ka soo tala-bixinta mashaariic sharci oo ay Golewaynaha u soo gudbisay, kulamo dadweyne, kulamo kala duwan oo ayla yeelatay Mauuliyiin iyo Haayado kala duwan, siidayn Maxbuus ajaanib ah oo xuquuq madani ah loo haystay iyo tababaro Aqoon korodhsi oo ay ka qaybgahay. Hadaba wax-qabadkii Gudidda oo kooban wuxuu ahaa sidan: -

### Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

1. **13/02/22 Gudidu** waxay kulan la yeelatay Komishanka Xuquuqal Aadamaha qaranka oo ay kala wareegtay bugaagta warbixin sanadeedka Xuquuqda Aadamaha.

2. **16/04/22 Gudidu** waxay kulan la qaadatay Gudoomiyaha Ha'aydda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha JSl iyo Saraakiisha Ha'yaddiisa.

### Kulamo hawl-leedyadii Gudiddu Dadwaynaha u qabatay.

1. **3-14/01/2022** Gudida waxay qabtay Wajigii labaad kulan hawleed socday mudo laba maalmood ah, kasoo lagu Lafa-guraayey Qabyo-Qoraalka Xeerka **Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruurta**
2. **16-17/06/2022** Gudidu waxay qabtay kulan hawleed socday mudo laba maalmood ah kasoo lagu Lafa-guraayey **Qabyo-Qoraalka Xeerka Qaxoontiga iyo Magan-galyo-doonka.**

### Tababaradii ay Guddidu kaqayb qashay.

**06/03/2022.** Guddidu Waxay ka qayb gashay kulan hawleed tababar ah oo ku saabsana kor u qaadista aqoonta Gudoonka Guddiyada Golaha Wakiilada JSL.

### Mashaariicda Sharci ee Gudiddu Golaha u soo gudbisay

1. **29/01/22._Gudidu** waxay Gole waynaha u soo gudbisay kana horjeedisay Warbixinta iyo **Qabyo-qoraalka Xeerka ilaalinta Xaquuqda Caruurta**.
2. **12-09-2022. Gudiddu** waxay Golaha u soo gudbisay Warbixinta iyo Qabyo-**Qoraalka Xeerka Qaxoontiga iyo Magan-galyo-doonka.**

### Siidaynta Maxbuus Yamani ah iyo Abaalmarinhii Gudida la siiyey.

**13/12/2022** Gudida waxay ku guulaysatay inay xoriyadiisii usoo celiyaan maxbuus Yamani ah, kaasi oo loo haystay xuquuq lacageed oo dhan **$108000.** Kadib markuu ka dhamaaday xukunkiisii.

Sidoo kale Jaaliyada Yeman ee ku dhaqan Hargeisa, oo ay gudidu kala shaqaysay siidaynta maxbuuskaa ayaa abaal marino **"Shahaado sharafyo ah"** ku maamuusay xubnaha gudida ee hawsha gacanta ku haysay, xaflad ka dhacday xarunta Golaha Wakiillada Jsl.

## 6. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu iyadoo markasta ka duulaysa awooda iyo waajjibaadka gaar ah ee uu siiyay Qodobka 61aad faqradaha 1aad, 2aad, 3aad, 4aad, 5aad iyo 6aad, ee Xeer hosaadka Golaha Wakiialda Xr.lr.01/2021, sidoo kale Qodobka 2aad faqradiisa 2aad Xarafka (a), (b) iyo (c), Qodobka 6aad faqradaha 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad iyo Qodobka 15aad faqrada 1aad xarafyada (a), (b) iyo (c) ee Xeerka Maamulka Maaliyadda Qaranka Xr.lr.75/2016.

Guddida waxay sanadkii 2022ka ay qabatay shaqooyin muhiim sida kasoo tala-bixinta Miisaaniayda Qaranka, mashaariic sharci iyo Masuuliyiin qaran oo ay Golewaynaha u soo gudbisay, sidoo kale waxay kulamo kalan duwan la yeesheen Masuuliyiin qaran oo kala duwan. Hadaba wax-qabadkii Gudidda oo kooban wuxuu ahaa sidan:-

### Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

1. **30/01/2022** Wasiirka W. Horumarinta Maaliyadda JSL
2. **02/06/2022** Wasiirka W. Horumarinta Maaliyadda JSL
3. **05/07/2022** Wasiirka W. Horumarinta Maaliyadda JSL
4. **07/08/2022** Wasiirka W. Horumarinta Maaliyadda JSL
5. **05/11/2022 iyo 16/08/2022** Hanti dhawraha Guud JSL
6. **05/11/2022 iyo 20/08/2022** Guddoomiyaha Baanka JSL
7. **06/11/2022** Guddida Doorashooyinka Qaranka JSL
8. **07/11/2022** Wasiirka W.Waxbarashada iyo Sayniska JSL
9. **07/11/2022** Shirgudoonka Golaha Wakiilada JSL
10. **07/11/2022** Wasiirka W. Warfaafinta JSL
11. **07/11/2022** Wasiirka W. Horumarinta Maaliyadda
12. **08/11/2022** Wasiirka W. Horumarinta Cafimaadka JSL
13. **08/11/2022** Wasiirka W.Shaqo galinta Qoyska iyo Arrimaha Bulshada

14. **09/11/2022** Guddoomiyayaasha Degmooyinka Hargeysa, Burco, Borame, Ceerigabo, Laascanood, Berbera, Gabiley iyo Saylac JSL
15. **09/11/2022** Wasiirka Wasaarada Arrimaha Guda JSL
16. **10/11/2022** Mareeyaha Guud ee Hay'adda Duulista iyo Madaarada JS
17. **12/11/2022** Mareeyaha Guud ee Haamaha Shidaalka Qaranka JSL
18. **12/11/2022** Mareeyaha Wakaalada Biyaha Hargeysa JSL
19. **12/11/2022** Mareeyaha Guud ee Dekkadaha JSL
20. **12/11/2022** Guddida Gurmadka Suuqa Waheen JSL
21. **14/11/2022** Wasiirka W.Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka JSL
22. **14/11/2022** Wasiirka W.H.Beeraha JSL
23. **14/11/2022** Wasiirka W.H.Biyaha JSL
24. **16/11/2022** Wasiirka W.Gadiidka iyo H.Jidadka JSL
25. **17/11/2022** Mareeyaha Guud ee Madbacadda Qaranka JSL
26. **20/11/2022** Wasiirka W.H.Maaliyadda JSL
27. **21/11/2022** Guddoomiyayaasha Guddiyada Golaha JSL
28. **22/11/2022** Shirgudoonka Golaha Wakiilada JSL
29. **07/11/2022 X**ubno Matalaayey Ururada Bulshada Rayidka (Gaar ahaan Ururada ka shaqeeya Horumarinta Waxbarashada) JSL
30. **12/11/2022** Xubno matalaayey Culimo Awdiinta Dalka JSL
31. **08/09/2022** Wasiirka W. Isgaadhsiinta iyo Tichnoolajiyada Jsl
32. **30/06/2022** Guddida Rugta Ganacsiga iyo Ganacsatada Sland
33. **22/01/2022** Boodhka sare ee Haayada Caymiska Qaranka JSL

## Mashaariicda Sharci ee Gudiddu Golaha u soo gudbisay

1. **29-11-2022** Waxay Gudiddu Golaha u soo gudbisay **Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2023-ka**
2. **06-02-2022** Waxay Gudiddu Golaha u soo gudbisay **Xeerka Shirkadaha Caymiska**
3. **15-01-2022** Waxay Gudiddu Golaha u soo gudbisay **Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022-ka**

## Kulamo hawl-leedyadii Gudiddu Dadwaynaha u qabatay.

**30-31/08/2022** Guddida dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu waxay kulan howleed u qabatay Mashruuca Sharciga Waxka bedelka Xeerka Maamulka Maaliyadda Qaranka **(PFM) Xr.lr. 75/2016** Wajigiisii labaad.

## Masuuliyiintii Qaran ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay.

1. **04/10/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Guleed Muuse Ismaaciil Galaal** oo loo soo magacaabay Gudoomiyaha Hay'adda Caymiska Qaranka.

2. **04/10/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Maxamed Xuseen Axmed** oo loo soo magacaabay Guddoomiye Ku-xigeenka Hay'adda Caymiska Qaranka.

Xeerarka Guddidu Gacanta ku hayso

1. Xeerka Jidaynta 2% Horumarinta Gobolada Bari Iyo Nidaaminta Cashuuraha Dawladda Dhexe Ay U Qabato Dawladdaha Hoose.

## 7. Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska.

Guddida Arimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoysku waa guddi ka mid ah gudi hoosaadyada golaha wakiilada. Shaqooyinka ay guddidani qabato waxaa ka mid ah u kuur galidda arimaha dhaqan, shareeco iyo qoys ee wasaaradaha iyo ururada wada shaqaynta la leh guddida. Hadaba, wax qabadka guddida oo kooban waa sidan soo socota:-

Kulamadii Gudidu laYeelatay Masuuliyiinta Qaranka

1. **03, January, 2022** – Guddida Wanaag-farista iyo Xumaan-reebista.
2. **06, January, 2022** – Wasiirka Diinta iyo Awqaafta.
3. **14, March, 2022** – Ururka Wacyigalinta iyo Dabargoynta Mukhaadaraadka.
4. **16, March, 2022** – Taliyaha Booliska
5. **23, October, 2022** – Wasiirka diinta iyo Awqaafta
6. **25, October, 2022** – Guddida Wanaag-farista iyo Xumaan-reebista.
7. **14, November, 2022** – Wasiirka Shaqagalinta, Arimaha Bulshada iyo Qoyska.
8. **27, December, 2022** – Jamciyadaha Qur'aanka Kariimka.

Masuuliyiinta Qaran ee ay Gudiddu ka soo Tala-bixisay Ansixintooda

**06, January, 2022** – Wasiirka Diinta iyo Awqaafta.

## 8. Guddida Arr. Dibadda, I. Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maal-gashiga

Guddiga Siyaasadda Arrimaha Dibadda, Iskaashiga caalamiga ah, Qorshaynta Qaranka Iyo Maalgashiga iyaga oo Gudanaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo Awoodaha uu siiyay Xeer-hoosaadka Golaha Wakiiladu, waxay sanadkii 2022ka ay qabatay shaqooyin muhiim sida, kormeero ay ku samaysay Wasaarada ay shaqa wadaaga yihiin iyo kulamo kalan duwan oo ay la yeelatay qaar ka mid ah Masuuliyiinta qaran. Hadaba wax-qabadkii Gudidda oo kooban wuxuu ahaa sidan:-

Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

1. **08/02/2022** Wasiirka **Wasaarada Horumarinta Maal-gashiiga iyo Warshadaha JSL.** Md: Abdillahi Abdirahman Aare
2. **12/10/2022** Wasiirka **Wasaarada qorshaynta qaranka**
3. **13/10/2022** wasiirka wasaarada Wasaarada Horumarinta Maal-gashiiga iyo Warshadaha.
4. **02/11/2022** wasiirka iyo wasiirku xigeenka wasaarada arrimaha dibadda iyo iskaashiga caalamiga ah

Masuuliyiintii ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay Ansixintooda.

1. **09/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Abdillahi Abdirahman Aare** Wasiirka Horumarinta Maal-gashiiga iyo Warshadaha

2. **09/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Cabdinaasir Cumar Jamac** Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda arrimaha dibadda iyo iskaashiga caalamiga ah
3. **11/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Ciise kayd** Wasiirka Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga caalamiga ah
4. **3/10/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Ahmed Aadan Ahmed Buuxane** Wasiirka Horumarinta Qorshaynta

## 9. Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada

Guddida Hawlaha Guud, Tiknoolajiyadda, Guryeynta & Dhulka iyaga oo Gudanaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo Awoodaha uu siiyay Xeer-hoosaadka Golaha Wakiiladu. Hadaba, Sanadkii 2022ka wax-qabadkii Gudiddu waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

1. **09/04/2022** Wasiirka Wasaaradda Hawlaha guud, dhulka & guryeynta JSL, **Mudane Cabdilaahi Abokor Cismaan.**
2. **05/10/2022** Maareeyaha Hay'adda Waddooyinka Somaliland,
3. **06/10/2022** Maareeyaha Hay'adda Waddooyinka Somaliland,

### Masuuliyiintii ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay Ansixintooda.

1. **15/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Cabdirisaaq Ibraahim Ataash** Wasiirka Wasaarada Horumarinta Jidadka iyo Gaadiidka
2. **13/06/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Cabdirisaaq Ibraahim Maxamed** Wasiirka Wasaarada Horumarinta Jidadka iyo Gaadiidka
3. **11/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Maxamuud Jaamac Warsame** Wasiir ku-xigeenka W. Hawlaha Guud iyo Guryaynta

### Kormeeradii Gudidda

1. **06/04/2022** waxay Gudiddu kormeer ku tagtay **Suuqii Waaheen** oo marka dab xoogan ku shufbeelay iyagoo u kuurgalaya khasaaraha ka dhashay dabkii uu suuqaasi ku gubtay intuu le'ekaa.

2. **11/04/2022** waxay kormeer ku tageen **Taliska Ciidanka Dab-damiska** waxayna halkaas kula kulmeen Taliyaha Ciidamada Dab-damiska **Sarreeye Guuto Axmed Maxamed Xasan (Axmed Sawaaxili).**

## Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaac

Guddida Arrimaha Gudaha iyo Difaaca iyaga oo Gudanaaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo Awoodaha uu u qeexay Xeer hoosaadka Golaha Wakiiladu, wax-qabadkeedii Sannadkii 2022ka wuxuu sidan:-

## Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

1. **25/01/2022** Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca, Amniga iyo Nabad-galyada ee Golaha Wakiilladu waxay kulan Xog-waraysi ah la yeelatay Gudoomiyaha Golaha Deegaanka Hargeisa Md. Cabdikariin Axmed Mooge.
2. **27/2/20222** Guddida Arrimaha gudaha difaaca iyo nabad-galyada Waxay Xafiiskeeda Kulan Kula Qaadatay Taliyaha Ciidanka Socdaaalka kulankaas oo ay isku waydaarsadeen warbixino iyo is su`aalo ku saabsan ciidanka socdaalka.
3. **01/03/2022**Guddida Arrimaha gudaha difaaca iyo nabad-galyada Waxay Xafiiskeeda Kulan Kula Qaadatay Ururada aan dowliga ahayn ee SONSOF kulankaas oo ahaa isbarasha iyo xog-waraysi.
4. **16/4/2022** Guddida Arrimaha gudaha difaaca iyo nabad-galyada Waxay Xafiiskeeda Kulan Kula Qaadatay Maayar ku-xigeenka Caasimada Hargeysa iyo Xoghaya fulinta D/hoose ee Hargeysa kulankaas oo ahaa kulal xog-wareysi ku saabsan masiibadii ka dhacday suuqa waaheen iyo halka ay wax marinayaa iyo sidoo kale Xeerkii caasimada.
5. **16/4/2022** Guddida Arrimaha gudaha difaaca iyo nabad-galyada Waxay Xafiiskeeda Kulan Kula Qaadatay Maayar ku-xigeenka Caasimada Hargeysa iyo Xoghaya fulinta D/hoose ee Degmada Hargeysa.
6. **03-2022** Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabad-Galyadu waxay Xafiiskeeda kulan kula yeelatay u qaabilsanaha UK ee Somaliland.

## Kormeeradii Gudidda

1. **29-03-2022**Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabad-Galyada ee Golaha Wakiillada JSL ayaa safar shaqo oo Ujeedkiisu ahaa u kuur-galka xaaladaha Amniga iyo xog-Uruurin ku saabsan waxay ugu baxday Goboalka saaxil caasimadiisa Berbera.
2. **13/3/2022** Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca, iyo Nabad-Galyada ee Golaha Wakiillada JSL ayaa Kormeer shaqo waxay ugu baxeen Gobalka Togdheer caasimadiisa Burco.
3. **15/03/202** Gudida waxay Kormeer shaqo oo ku saabsan Arrrimaha Nabadgalyada iyo xog-waraysi iyo sidoo kale baahiyaha dawlada hoose ah ku tagtay Degmada Shiikh ee Gobolka Saaxil.

## Masuuliyiintii ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay Ansixintooda.

4. **09/01/2022** waxay ka soo talo-bixisay in Xilka loo ansixiyo **Md. Cabdilaahi Xusen Cilmi** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Arrimaha Gudaha.
5. **23/05/2022** waxay ka soo talo-bixisay **Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Axsaabta Siyaasada** oo ka kooban 7 Xubnood.
6. **20/06/2022** waxay ka soo talo-bixisay **Komishanka Doorashooyinka Qaranka** oo ka kooban 7 Xubnood.

## QORSHE ISTARAATIJIYADEEDKA 5TA SANNO EE GOLAHA

Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. C/risaaq Khaliif Axmed** isago ka duulaya Qodobka $3^{aad}$ ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada wuxuu **13 December 2021** Gudi gaar ah (ad hoc committee) u magacaabay soo diyaarinta Qorshaha 5ta Sanno ee soo socota Golaha Wakiilladu ku shaqayn doono, ka dib markuu arkay ahmiyada ay leedahay in Goluhu helo qorshe Istaraatiijiyadeed uu ku hawl galo, isla markaana loo baahan yahay in la dhamaystiro qorshaha iyo istaraatiijiyada Golaha ee shanta sanno ee soo socda (2022-2026) Gudiddaas oo ka kooban 10 Mudane iyo laba Agaasime Waaxeed.

Hadaba, Gudidaas gaarka ahi, si ay gudato hawlaha iyo waajibaadka loo xilsaaray waxay kulankoodii u horeeyay yeesheen 15 January 2022 waxay ku doorteen Gudoon, iyagoo Gudiddu Gudoomiye u dooratay **Md. Mukhtaar Xasan Maydhane**, halka Md. Maxamed Xasan Siciid u dooratay Gudoomiye ku-xigeen, isla markaana waxay isla qaadatay qaabka ay u shaqaynayso, iyadoo kulankii labaad Gudiddu ku lafa-gurtay siday dardargalin lahayd qorsheheeda shaaqo.




*Gudoomiyaha Golaha oo Kulan la yeeshay Gudidda Soo diyaarinta Qorshaha 5ta Sanno ee Goluhu ku shaqayn doono*

31 January 2022 Gudiddu waxay kulankeedii u horeeyay la yeelatay **Gudoomiyaha Golaha Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed**, ugu horeyn waxay Gudiddu Gudoomiyaha la wadaagtay qorsheheeda shaqo, waxyaabaha ay maamul ahaan uga baahan yihiin Shir-gudoonka iyo guud ahaan Golaha iyo muddad ay ku qaadanayso hawshu. Gudoomiye Khaliif wuxuu dhiniciisa Gudidda ku booriyay inay dedejiyaan isla markaana Golaha u soo saaraan qorshe istaraatiijiyadeed uu ku shaqeeyo shanta sanno ee soo socota.



*Gudoomiyaha Golaha iyo Gudoomiyaha Gudidda Diyaarinta Qorshaha 5ta sanno ee Golaha Wakiillada*

Intaas ka dib, Gudiddu waxay Guda-gashay hawleheeda shaqa, waxayna ugu horeyn Gudiddu dalbatay La-taliyayaal khibarad u leh samaynta qorshayaasha Baarlamaanada, waxaynu Gudiddu heshay laba la-taliye oo ay Hay'adda IRI ka caawisay kuwaas oo Dalka dibadiisa laga soo qaatay, labadaas la-taliye oo kala ahaa Brown Makosi iyo Ahmed Issak oo labaduba u dhashay Dalka Kenya, waxayna Gudidda ka caawiyeen soo diyaarinta qabyo-qoraalka Qorshaha shanta sanno, iyagoo muddo bil (February 2022) ah gudidda la shaqaynayay.

Gudidda oo ay weheliyaan La-taliyaasha iyo xoghaynta Goluhu waxay yeesheen kulamo is-daba joog ahaa oo lagu lafa-gurayay, laguna falanqaynayay qorshahaas waxyaabaha uu ka koobnaanayo, qaabka uu yeelanay iyo cutubyada uu ka koobnaanayo.

Gudiddu waxay labada la-taliye kala wareegtay nuqulka kowaad ee qabyo-qoraalka 27 February kulan uu goob joog ahaa **Gudoomiye ku-xigeenka 2aad Md. Cali Xaamud Jibriil**, kulankaas oo lagu soo bandhigay nuqulka qabyada ah ee qorshaha shanta sanno, iyo waxyaabaha ka dhiman sidii loo dhamaystiri lahaa, taas oo ay ugu horeyso ka qayb-galinta iyo kala tashiga qaybaha ay khusayso (stakeholder's consultation meetings), waxayna Gudidda iyo Gudoomiye ku-xigeenka 2aad u mahadnaqeen labada khabiir ee la-talinayay Gudidda.

Intaas Gudiddu waxay gudo-gashay kulamo dhowr ah oo ay la yeelatay qaybaha kala duwan ee khuseeyo Qorshaha shanta sanno sida hay'addaha dawlada ee si toos ah Golaha ula shaqeeya, Gudiyada Golaha, Agaasaime Waaxeedyada iyo La-taliyayaasha Golaha, hay'addaha Caalamiga ah ee Golaha la shaqeeya, Ururada Bulshada, Saxaafada iyo Haweenka, si ay tallooyinkooda iyo aragtidooda u hesho, kulamadaas oo qabsoomay intii u dhaxaysay **14 March ilaa 25 March,** kulamadaas oo si hufan u qabsoomay waxay gudiddu ka ururisay soo jeediyo iyo fikrado wax ku ool ah kuwaas oo qabyo-qoraalka ay ku soo dartay wixii u aragtay muhiim.

Kadib markii ay kulamadaas ka soo ururisay Guddidu xog baaxad leh, waxa ay bilowday inay is waafajiso qorshaha iyo falcelintii daneeyayaasha Golaha, kuwaasoo saamaynayey hawlaha iyo ujeedooyinkaa istaraatajiyadeed iyo qaabka loo fulinayoba. Ugu dambeyn, Gudidda Gaar ah ee Qorshaha shanta sanno loo saaray waxay Nuqulka Qorshaha Shanta Sanno si rasmiya ugu wareejisay Shir-gudoonka.

### Gudoomiye oo Magacaabay Agaasimayaal, dib u habayna ku sameeyay Waaxyaha Golaha

**07 December 2022** Gudoomiyaha Golaha Wakiillada Md. C/risaaq Khaliif Axmed ayaa Magacaabay Agaasime Waaxeedyada iyo ku-xigeenada Golaha Wakiillada, Gudoomiyuhu isagoo ka duulaya baahida loo qabo in dib u habeyn iyo dara-dargalin lagu sameeyo shaqada Golaha isla markaana shaqadu ay u noqon lahayd mid tayo leh.

Wuxuu dhimis ku sameeyay tirada Agaasinka Waaxyaha Golaha oo ahaa 15 waaxood, wuxuu ku soo koobay 10 Waaxyood, isagaoo Gudoomiyuhu u magacaabay 10 Agaasime Waaxeed oo qaarkood cusub yihiin, sidoo kale Gudoomiyuhu wuxuu magacaabay 7 agaasime ku-xigeen oo aanu Goluhu u hore lahayn taas oo waaxyaha maamulkooda lagu soo kordhiyay Agaasime ku-xigeen.

10 Waaxood ee Gudoomiyuhu ku soo koobay Waaxyihii Golaha waxay kala yihiin:-

| No. | Agaasimaha | Waaxda |
|---|---|---|
| 1. | Cawad Cali Maxamed | Agaasimaha Waaxda Hadal-qoraalka iyo Daabacaadaha |
| 2. | Farax Ibraahim Gamuute | AgaasimahaWaaxda Maamulka iyo Maaliyada |
| 3. | Ismahan Yuusuf Ibraahim | Agaasimaha Waaxda Xoghayamaha, Gudi, &Gobolada |
| 4. | Saleebaan C/sitar Dubad | Agaasimaha Waaxda Warbaahinta, IT & Xidh. D/weynaha |
| 5. | C/naasir Cismaan Max'ud | Agaasimaha Waaxda Qorshaynta iyo Tababarada |
| 6. | Maxamuud Cismaan | Agaasimaha Waaxda Xusuus dhawrka iyo Leybareeriga |
| 7. | C/laahi Cabdi Aaadam | Agaasimaha Waaxda Cil-mibaadhista iyo Shuruucda |
| 8. | Siciid Yaasiin Ismaaciil | Agaasimaha Waaxda Hab-maamuuska iyo Amniga |
| 9. | Mahad Cumar Siciid | Agaasimaha Waaxda Cududda Shaqaalaha |
| 10. | Xamse Max'ud X, Muuse | Agaasimaha Waaxda Miisaaniyada (Budget Department) |

Gudoomiyuhu wuxuu Xubnaha shaqaalaha ee uu magacaabay kula dar-daarmay inay la yimaadaan shaqo hufan oo tayo leh, isla markaana Masuuliyadaha loo xil saaray uga soo baxaan si wanaagsan, wuxuuna ugu duceeyay in masuuliyada kala duwan ee ay qabteen rabi u fududeeyo kuna asturo.

## AQOON-KORODHSIYADII LOO QABTAY GUDIYADA GOLAHA

**March 5-7, 2022,** Waxa tababar ku saabsan kor u qaadista aqoonta Gudoonka Guddiyada kala duwan Golaha Wakiillada tababarkan oo soconayay mudo laba cisho ah ayaa lagu qaatay sida ay Guddiyadu u shaqeeyaan, una gutaan waajibaadkooda shaqo ee ay Golaha u qaabilsan yihiin.




*Xubnaha Gudiyada Golaha oo ku jiraa kulan aqoon korodhsi ku saabsan sida Gudiyadu u shaqeeyaan*

Kulankaas oo uu furay Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiillada Md. Cali Xaamud Jibriil, wuxuu ku booriyay in Xildhibaanadu ay ka faa'iidaystaan tababarka isla markaana ku dabaqaan hawl-maalmeedka ay Guddiyada, isagoo u mahadceliyay hawl-wadeenada Golaha ee soo qaban qaabiyay tababarkan iyo xarunta (Center for SDGs) oo farsamo ahaan Golaha ugala shaqaysay qabashada tababarkan iyo Hay'adda Caalamiga ah ee IRI oo maalgaliyay qabashadiisa.

Dhinaca Kale waxa **21 March 2022,** tababar socday mudo laba cisho loogu qabtay Xoghaymaha Gudiydda, tababarkaas oo hawl-wadeenada Gudiyada lagu siiyay aqoon dheeraada oo khuseysa shaqada ay Gudiyada u qabtaan, waajibaadka shaqo ee saran iyo hab-raaca shaqo gudasho, waxaan Tababarkaas Golaha ka caawiyay Hay'adda Adam Smith oo ka mid ah hay'addaha Golaha la shaqeeya.




*Xoghaymaha Gudiyada u shaqeeya oo la siiyay aqoon iyo tababar ku saabsan shaqada Gudiyada iyo siday ula shaqeeyaan*

- **21 June 2022,** Gudoomiyaha Golaha Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed ayaa furay kulan aqoon korodhsi (workshop) hal maalin socday oo loo qabtay Mudanayaasha Guddida Arrimaha Gudaha, Amniga iyo Difaaca, ujeedkiisuna ahayd xoojinta doorka Baarlamaanka ee kormeerka hay'addaha Qaranka ee qaabilsan amniga.
  .
- **19 July 2022,** Tabarbar aqoon korodhsi ah aaya loo qabtay Xoghaymaha Gudiyadda Golaha, Tababarkaas oo socday laba maalmood wuxuu ku sabaasan Habka Xeerarka iyo xeer-hoosaadyada loo sameeyo, iyadoo lagu qabtay Xarunta Golaha ayna soo qaban-qaabisay **Ha'ayadda Adam Smith.**

- **23 July 2022 waxa** Xildhibaanada Golaha Wakiillada loo qabtay kulan aqoon iswaydaarsi, kulankaas oo uu furay Gudoomiyaha Golaha Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed, kulankaas aqoon korodhsiga ah waxa soo qaban qaabisay Hay'adda UNDP wuxuu ku saabsanaa shaqada iyo waajibaadyada Golaha Wakiilada, kulankaas oo socday laba maalmood.

## DOORKII GOLAHA WAKIILLADA EE ABAARIHII DALKA

Golaha Wakiiladu wuxu **6 February 2022** ka dooday Xaalada Abaaraha dalka, dooddaas ka dib, waxa Goluhu ka soo saaray qaaraar dhowr qodob ah ka dib markii Gudidda Hawlaha Golaha (Business Commiittee) oo loo gudbiyay wixii doodda laga soo ururiyay ay naaqisheen si ay go'aan uga soo saaraan, waxayna gudiddu ka soo

saartay dooddii dhowr qodob oo Gudoomiyaha Golaha Wakiillada Md. C/risaaq Khaliif Axmed Golaha ka hor akhriyay.



*Shir-gudoonka oo Madaxweynaha ku-xigeenka ku wareejinaya $50 kun oo dollar oo Goluhu kaga qayb-qaatay gurmada abaaraha*

Wuxuuna Goluhu Go'aan qaylo dhaan ah ka soo saaray Xaalada ba'an ee Abaaraha ee dalka ka jiray, waxa qodobada doodda ka soo baxay ku jiray in Goluhu taakulada dadka abaaruhu saameeyeen kaga qayb-qaato lacag qadarkeedu **$50,000 (konton kun oo dolar),** taas oo Shir-gudoonka Golaha oo Gudoomiyuhu hogaaminayo ay isla maalintii xigtay iyadoo kaash ah $50,000 ku wareejiyeen Gudidda Abaaraha Qaranka oo Madaxweyne ku-xigeenku Gudoomiye u yahay.

Sidoo kale waxa Goluhu Baaq Gurmasho ah u diray Dawlada Dhexe, Hay'addaha Caalamiga ah iyo kuwa Wadaniga ah, Ganacsatada, Dawladaha qaadhaan bixiyayaasha ah iyo Qurbo jooga reer Somaliland inay si deg deg ah ugu gurmadaan Dadka abaaruhu saameryeen kana qayb noqdaan dedaalada dadka iyo duunyadaba loogu gurmanayo.

## SAFARADII DALKA DIBADDIISA LOOGU BAXAY

- **Wafti uu Hogaaminay Gudoomiye ku-xigeenka 2aad oo safar ugu baxay Dalka Belgium.**

**17 March 2022** Wafti uu Hogaaminayay Gudoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiilada **Md. Cali Xaamud Jibriil** kana qayb yihiin Xildhibaano ka tirsan Gudidda Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Golaha oo Safar ku tagay Dalalka Yurub ayaa Dalka Belgium Kulamo kula yeeshay Xildhibaanada Baarlamaamka Midawga Yuru (Parliament European Union) ee xaruntoodu tahay Brussels, Belgium, kulankaas oo hordhac u ahaa kulamo kala duwan waftiga Xildhibaanada ee uu Gudoomiye Ku-xigeenka 2aad hogaaminayo ay la yeesheen Xubnaha Baarlamaanka Midwaga Yurub, Masuulyiin kala duwan iyo hay'addo caalami ah.




*Gudoomiye ku-xigeenka 2aad oo Safar ku jooga Dalka Belgium kulamo kala duwan dalkaas kula yeeshay Madxda EU-da*

- ## Gudoomiye ku-xigeenka Gudida Joogtada ah oo ka qayb galay Shir Caalamiya oo Tunis ka dhacay.

Gufoomiye kuxigeenka Gudida Joogtada iyo Anshaxa ee Golaha **Md. Axmed Xasan Cali (Casoowe**) ayaa ka qayb galay shir Caalamiya oo ka dhacay Magaalada Tunis ee Dalka Tunisia 30th 31st March 2022, kaas oo ay ka soo qayb galeen xildhibaano ka socday baarlamaanada Wadamada Carabta oo ay Somaliland ku jirto.

Shireaynahaas ayaa lagaga hadlayay doorka Baarlamaanada ee horumarinta caafimaadka qoyska (hooyada iyo dhalaanka), sidii miisaaniyad ku habboon loogu qoondayn lahaa iyo sidii baarlamaanadu ugu kormeeri lahaayeen hay'adaha dowliga iyo kuwa aan dawliga ahayn ee gacanta ku haya arrimaha khuseeya caafimaadka hooyada iyo dhalaanka. Shirka waxaa kaloo ka soo qayb galay Forum of Arab Parlimantarians on Population and Development iyo hay'ado caalami ah oo ay ka mid yihiin International Planned Parenthood Federation (IPPF) qaybta dunida Carabta iyo UNFPA. Shirkaas oo uu Xildhibaanku ku matalayay Somaliland. Waa markii ugu horraysey ee ay Soomaaliland si rasmi ah uga qayb gasho shirarka Baarlamaanada Wadamada Carabta ah.



*TUUNIS. Md. Axmed Cabdi Casoowe Gud. Ku-xigeenka Gudidda Joogtada oo ka qayb-galay Shirka Baarlamaanada Carabta*

Arrintan ayaa sii xoojinaysa Meeqaamka iyo doorka siyaasadeed ee Jamhuuriyada somaliland ka ciyaarayso fagaarayaasha Caalamiga ah, kana mid tahay xidhiidhada aadka isu soo taraya ee somaliland la yeelanayso dalalka Afrika, Carabta iyo guud ahaan dunidoo dhan

## ➢ Wafti XIldhibaano oo Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad hogaaminayo oo u safray Dalka Ingiriiska.

**Bishii July** Wafti uu Hogaaminayay **Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiilada Md. Siciid Mire** ayaa safar ku tagay Dalka boqortooyada Ingriiska, waftigan oo ka koobnaa Gudoomiyaha iyo 5 Xildhibaan oo kala ahaa:-

1. Xildhibaan Abubakar Siciid Cali
2. Xildhibaan Maxamed Xuseen Jaamac
3. Xildhibaan Xasan Saleban Dhuxul
4. Xildhibaan C/laahi Sh. Muxumed Axmed
5. Xildhibaan Maxamuud C/laahi Jaama

## ➢ Wafti ka kooban Xildhibaano iyo Xoghayaha Guud oo u baxay Dalka Kenya.

**06 August 2022** Wafti ka kooban Xildhibaano & Xoghayaha guud ee Golaha Wakiilada ayaa Safar ugu baxay Dalka Kenya, iyadoo waftigaas ay dalka Kenya ku soo dhoweeyeen masuuliyiinta Safaarada Somaliland ee Dalka Kenya.

- **Xildhibaan Guuleed Maxamed oo Dalka UAE kaga qayb-galay Shir-wayne Carbeed.**

**Xildhibaan Guuleed M. Warsame** oo ka tisan Golaha Wakiillada ayaa **07-11 August 2022** Magaalada Shaariqa ee Wadanka Emaaraadka Carabta kaga qayb Galay shir ay soo qaban-qaabisey Jaamacada Carabta Qeybteeda Horumarinta Maamulka (Arab Administrative Development Organization (ARADO).

Xildhibaanka oo Shirkaas ku matalayay guud ahaan dawlada Somalilang gaar ahaan Baarlamaanka (Golaha Wakiillada) waxa Shirkaas ka soo qayb-galay masuuliyiin iyo madax ka kala socday Dalalka ka tirsan Midawga Jaamacada Carabta.

- **Safar Dalka UK ay ku tageen Laba Xildhibaan iyo Xoghayaha Guud ee Goluhu**

**31 November 2022** Waxa Dalka Boqortooyada Ingiriiska safar marti-qaad ku tagay Laba Xildhibaan oo kala ahaa Md. Axmedkhaliif Jaamac iyo Md. Maxamed iyo Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle, safark oo qaatay mudo bil ah, waxay kulamo kala duwan la qaateen Jaaliyada reer Somaliland ee UK kuwaas oo xaflado kala duwan ugu qabtay Magaalooyinka dalkaas, waxayna dalka dib ugu soo laabteen **03 December.**

## WUFUUDIHII IYO MADAXDII KALE EE GOLAHA YIMI

- **Wafti EU-da & UK ka socda oo Kulan la yeeshay Shirgudoonka**

Wafti ka socdey wakiilada **midowga Yurub iyo UK** ayaa booqasho kooban ku yimi Dalka, waxayna soo booqdeen Xarunta Golaha Wakiilada **25 Jan 2022,** iyagoo kulan la yeeshay Shirgudoonka Golaha iyo Xubno Guddida Arrimaha Dibada ka tirsan.

Kulankan oo si qiime leh u dhacay, waxaa Gudoomiye **Md. Cabdirisaaq Khaliif Ahmed** oo kulanka furay horeyn si diiran u soo dhaweeyey waftiga wakiilada Midowyga Yurub iyo UK, isagoo Gudoomiyuhu xusey in taageeradooda ay Somaliland siiyaan gaar ahaan Golaha Wakiladaba ay uga mahad-celinayaan.

Intii lagu jiray kulankas Mr. Xasan Xiis oo ah la- taliyaha Arrimaha Dibada ayaa xog presentation Kooban ah la wadaagey xubnaha ka socdey midowga Yurub iyo UK, presentation oo soo koobayay guud ahaan baahiyaha Golaha iyo Meelaha Qorshaha Shanta (HoR 5 Years Strategic plan) ee Goluhu diirada saarayo in laga shaqeeyo. watigu dhinacooda waxay Shir-gudoonka waydiiyeen su'ku saabsan meelaha mudan in ay wax ka qabanayaan mustaqbalka dhaw. Waxaa sidoo kale ay ka wada hadleen doorka Golaha Wakiilada ee ku saabsan dhamaystirka xeerarka muhiimka u ah nabada, dimuquraadiyada, doorashooyinka iyo arrimaha bulshada.

Kulanka wuxuu ku soo dhamaadey jawi degan oo is-afgarad. Waana markii ugu horey ee ay wafti intan miisaankiisu leegayahay Golaha Wakilada booqasho shaqo ku yimaadaan tan markii la soo doortay Golaha 5aad ee Wakiillada Cusub 31 June 2021kii, Xubnaha Waftigaas waxay kala ahaayeen xubno ka kala socday Dalal kala duwan kana mid ahaayeen.

1. *Maria Groeneveld (EU)*

*2. Adnan Ahmed (EU)*
*3. Johan Svensson (Sweden)*
*4. Wacheke Michuki (Sweden)*
*5. Essi Raitala (Finland)*
*6. Nita Syvaoja (Finland)*
*7. Sascha Kienzle (Germany*
*8. Erling Johnsen (Norway)*
*9. Haako Svane (Norway)*
*10. Morgan Riley (UK)*
*11. Lizzie Walker (UK)*
*12. Mathias Kjaer (DK)*

- **Kulankii Shirgudoonka Golaha iyo Safiirka Dalka Sweden**

**05 April 2022** Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed** iyo Gudoomiye kuxigeenka 1aad Golaha **Md. Siciid Mire Faarax (Giire)** oo ay weheliyaan Xoghayaha Guud Cabdirisaaq Siciid iyo Lataliyaha shirgudoonka iyo Agaasimaha Qorshaynta ayaa kulan la qaatay Safiirka Dalka SWEDEN **Per Lindgarde** oo uu weheliyo madaxa siyaasada Safaarada **Mr. Yahan Svensson.**




*Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku-xigeenka 1aad oo Xafiiska Gudoomiyaha kula kulmay Safiirka Dalka Sweden*

Safiirka oo ka mid ahaa Wufuud tiro badan oo dalka ku yimi safar ay ujeedadoodiisu tahay sidii ay indhaha u soo saari lahaayeen Masiibadii dabka baaxada lahaa ee uu ku gubtay Suuqii ugu weyn dalka ee WAAHEEN.

Safiirka iyo shir-gudoonka ayaa xaalada suuqa waaheen ka sokow waxay ka wada hadleen Xaaladii abaaraha ee dalka ka taagnayd iyo halka wax marayaan, sidoo kale waxay isla eegeen Xaalada dimuqraadiyada iyo doorashooyinka inagu soo fool leh.

Kulanka oo ay wakhti wada qaateen labada dhinac waxay ku kala qaateen xogo kala duwan, iyagoo isla meel dhigay talaabooyin ay tahay in hore loo sii qaado si wax looga qabto baahiyaha abaareed ee taagnaa, ka qayb qaadashada gurmadka Suuqa Waaheen iyo kor u qaadista Dimuqraadiyada dalka.

### ➢ Wafti ka socday Crisis Group oo Gudoomiyaha Goluhu la kulmay

Gudoomiyaha **Golaha Wakiilada Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed** ayaa xafiiskiisa ku qaabilay **08 July 2022** wafti ka socda **Crisis Group,** oo Somaliland Booqosho Kujooga, waxaana kulankaas Gudoomiyaha ku weheliyay La-taliyaha Arrimaha Dibada Mr. Xasan Xiis.



Ujeedada guud ee booqashadooda **Crisis Group** Somaliland ku ymaadeen waxa ay ahayd xogdoon iyo xog-ururin xaaladda guud ee siyaasadeed, bulsho iyo deegaameed ee dalka, xubnahaas oo kala ahaa **Omar S Mahmoud iyo Xakariya Yussuf** oo labaduba ka faallooda mandaqadda.

### ➢ Wafti laba Xildhibaan oo ka socday Baarlamaanada Dalalka Finland iyo Sweden

Shir-gudoonka iyo qaar ka mid ah Xildhibaanada Golaha ayaa **23 July 2022** kulan la qaatay laba Xildhibaan oo ka kala socday Baarlamaanada dalalka Finland iyo Sweden, labadan Xildhibaan oo asal ahaan reer Somaliland ka soo jeeda ayaa kala ahaa

Xildhibaan Suldaan Siciid Ahmed oo ka tirsan barlamanka dalka Finland islamarkaana ah ergeyga gaarka ah ee Finland u qaabilsan dhexdhexaadinta nabada geeska afrika iyo Xildhibaan Mubaarik Abdirahman oo ka tirsan barlamanka Sweden. Ujeedada kulanka ayaa ahaa khibrad is weydaarsi iyo isku xidhka Barlamaanada dalalkooda iyo kan Somaliland.



*SHir-gudoonka, qaar ka mid ah Xildhibaanada iyo SHaqaalaha G/Wakiilada JSL iyo Labad Xildhibaan oo ka socda Sweden iyo Finland*

- ## Wafti Hay'adda UNDP oo Gudoomiyuhu kulan la yeeshay

**07 November 2022** Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Mudane Cabdirisaaq Khaliif Axmad** oo uu wehliyo Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ayaa xafiiskiisa ku qaabiley madaxa Hay'adda Qaramada midoobey u qaabilsan horumarinta ee UNDP, ee Somaliland iyo Somalia, **Jocelyn Mason**, iyo ku xigeenka ahma madaxa mashaariicda ee UNDP, Sophie Kemkhadze. Kulankan oo daarranaa is barasho iyo dar-dar-galin ku aadan mashaariicda ay UNDP kala shaqeyso Golaha Wakiilada.

Kulankan waxaa ugu horeyn furay Gudoomiye Cabdisaaq, isagoo ugu horeyn uga mahadceliyey UNDP joogtaynta wada-shaqaynta ay wadaagaan Golaha, isaga oo ka war-bixiyey xaalada guud ee Golaha Wakiilada, iyo waxyaabaha mudnaanta u ah Golaha inay qabtaan muda-xileedka 5 sanno ah.

Waxa Guddoomiyuhu xusay in uu saxeexay oo uu dhaqangal yahay qorshe istraatajiyadeedka

5ta sanno oo xambaarsan hawlaha goluhu mudnaanta siinayo in uu qabto.

Dhinaca UNDP, Jocelyn wuxuu balan-qaadey in ay UNDP sii wadi doonto hawlihii ay ka taageeri jireen Golaha Wakiilada, isla markaana ay kala shaqeyn-doonaan Golaha sidii uu u fulin lahaa qorshaha shanta sannadood ee 2022-2026 ee Golaha (five-year strategy plan).

Kulanka waxa dhinaca Golaha Wakiillada uga qayb-galay
1. Md. Cabdisaaq Khaliif Axmed, Gudoomiyaha Golaha Wakiilada.
2. Md, Siciid Mire Giire, Gudoomiye ku xigeenka 1aad.
3. La-taliyaha Arrimaha Dibada iyo Hay'adaha Caalamiga Mr. Xasan Xiis.
3., Agaasimaha Waaxda Qorsheynta Cabdinaasir Cismaan Maxamuud

Dhinaca UNDP waxaa kulanka joogay
1. Jocelyn Mason, UNDP country Representatives Wakiilka UNDP ee Somaliland iyo Somalia
2. Sophie, ku xigeenka wakiilka UNDP ee Somaliland iyo Somalia
3. Samira Xasan, madaxa xafiiska UNDP ee Somaliland.
4. Mascuud Cabdi, madaxa barnaamijka UNDP ee qaybta la shaqeysa Baarlamaanka.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**

# LIISKA TIXRAACYADA.

## B) Ajandayaasha Kal-fadhiyadii Golaha

**Ajandaha Kal-fadhiga 2[aad] ee Golaha Wakiilada.**

**04/12/2021**

1. Warbixinta Shir-gudoonka Golaha Wakiillada
2. Warbixinta Guddida Joogtada iyo Gudiyadda kale ee Golaha Wakiillada.
3. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

| No. | Magaca Xeerka | Marxalada uu marayo | Cidda Gacanta ku haysa |
|---|---|---|---|
| **B.** | Qabyo-Qoraalka Xeerka Shirkadaha Caymiska | Akhriska 1[aad] | Guddida Dhaqaalaha |
| **T.** | Xeerka Illaalinta Xaquuqda Caruurta | Akhriska 1[aad] | Guddida Shuruucda |
| **J.** | Miisaaniyada Qaranka 2022 | Wasiirka Maaliyada | Wasiirka Maaliyada |
| **X.** | Xeerka Sahaminta Shidaalka iyo Soo Saaristiisa | Guurtida ka soo noqoday | Golewaynaha |
| **Kh.** | Xisaab-xidhka 2020 | Akhriska 1[aad] | Gudida Dabo-galka |
| **D.** | Xeerka ka-hotaga iyo xakamaynta, ka Ganacisga iyo Tahriibka Dadka | Akhriska 1[aad] | Golewaynaha |
| **R.** | Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada **Xeer. Lr. 14** | Ka soo noqoday madaxweynaha | Golewaynaha |
| **S.** | Xeerka Macdanta Qaranka | Akhriska 1[aad] | Guddida Khayraadka |
| **Sh.** | Wax-kabedelka Xeerka Maaraynta Maaliyada Dawladda - Xeer.Lr. 75/2021 | W.H.Maaliyada | Gudidda Dhaqaalaha |
| **Dh.** | Wax-kabedelka Xeerka Dakhliga Cashuuraha Beriga **Xeer.Lr.72/2016** | W.H. Maaliyada | Xafiiska Gudoomiyaha |
| **C.** | Xeerka Dakhliga Shidaalka | Akhriska 1[aad] | Guddida khayraadka |

4. Xeerarka Golaha Guurtida ka soo noqda
5. Iyo Wixii kale ee soo kordha

## T. Liiska Mudanayaasha Golaha Wakiillada

| No. | Magaca | |
|---|---|---|
| 1 | Cabdirisaaq Khaliif Axmed Guuleed | Gudoomiye |
| 2 | Siciid Mire Faarax (Giire) | Gudoomiye ku-xigeenka 1aad |
| 3 | Cali Xaamuud Jibriil Faarax | Gudoomiye ku-xigeenka 2aad |
| 4 | Aadan Cismaan Xarbi Cawaale | Xubin |
| 5 | Abiibakar Siciid Cali Gaboobe | Xubin |
| 6 | Abokor Faarax Warsame Caga-Yare) | Xubin |
| 7 | Amiin Saleebaan Jaamac Rooble | Xubin |
| 8 | Axmed Cabdi Ducaale (Walhad) | Xubin |
| 9 | Axmed Cabdi Muuse Cige (Inni) | Xubin |
| 10 | Axmed Dayib Aadan Guuleed ( Kucadeeye) | Xubin |
| 11 | Axmed Jaamac Saalax Maxamed | Xubin |
| 12 | Axmed Maxamed Hurre Ducaale (Barkhad) | Xubin |
| 13 | Axmed Maxamed Maxamuud Xasan (Kaare) | Xubin |
| 14 | Axmed Maxamuud Cabdillaahi Jaamac (Fanax) | Xubin |
| 15 | Axmed Muuse Jaamac Diiriye | Xubin |
| 16 | Axmed Xasan Cali Yuuusf (Casoowe) | Xubin |
| 17 | Axmed Yaasiin Maxamed Xasan Ducaale | Xubin |
| 18 | Axmed Yuusuf Nuur Guruuje | Xubin |
| 19 | Bakhad Jaamac Xirsi Batuun | Xubin |
| 20 | Bashiir Xuseen Xirsi Bulaale | Xubin |
| 21 | Bile Cabdi Ducaale Samatar | Xubin |
| 22 | Cabdiixakiim Hugur Cabdi Guuleed (Dhoolhaye) | Xubin |
| 23 | Cabdikariim Aadan Cali Dubad | Xubin |
| 24 | Cabdikariim Aadan Cumar Dhirane | Xubin |
| 25 | Cabdikariim Miicaad Isaaq Xuseen | Xubin |
| 26 | Cabdikariin Maxamed Muxumed Cumar | Xubin |
| 27 | Cabdillaahi Sh. Muxumed Axmed Cali (Gacmodhere) | Xubin |
| 28 | Cabdillaahi Yuusuf Axmed Abokor | Xubin |
| 29 | Cabdillahi Muuse Cabdi Cawaale | Xubin |
| 30 | Cabdinaasir Yuusuf Cisamaan (Qodax) | Xubin |

| | | |
|---|---|---|
| 31 | Cabdiqani Maxamed Aadan Cali (Qaniyo) | Xubin |
| 32 | Cabdirashiid Cabdilaahi Muuse Maxamed | Xubin |
| 33 | Cabdiraxmaan Yuusuf Maxamuud Cawaale (Badheedha) | Xubin |
| 34 | Cali Jaamac Caraale Bare (Cali Qaran ) | Xubin |
| 35 | Cali Xuseen Nuur Kooshin | Xubin |
| 36 | Cumar Jaamac Faarax Axmed | Xubin |
| 37 | Eng Axmed Cabdi Ibraahim Cige (Timo-Jilic) | Xubin |
| 38 | Eng Xirsi Cabdilaahi Xirsi Odowaa | Xubin |
| 39 | Faysal Yuusuf Jaamac Xaashi | Xubin |
| 40 | Fu'aad Axmed Diiriye Faarax | Xubin |
| 41 | Guuleed Maxamed Warsame Guuleed | Xubin |
| 42 | Ibraahim Cali Jaamac (Suudi) | Xubin |
| 43 | Ibraahim Maxamed Jaamac Boodhle | Xubin |
| 44 | Jaamaal Aadan Diiriye Ciise | Xubin |
| 45 | Jaamac Abokor Maxamed Mire (Indho Case) | Xubin |
| 46 | Jaamac Axmed Oogle (Caano Boodhe) | Xubin |
| 47 | Jamaal Cali Aadan (Jaah) | Xubin |
| 48 | Jimcaale Axmed Cilmi Yoonis | Xubin |
| 49 | Khadar Cali Xasan Maxamed | Xubin |
| 50 | Maxamed Abiib Yuusuf Jaamac | Xubin |
| 51 | Maxamed Cismaan Maxamed Samatar(Gurey) | Xubin |
| 52 | Maxamed Jaamac Ismaaciil (Koodbuur) | Xubin |
| 53 | Maxamed Jaamac Liibaan Cawaale | Xubin |
| 54 | Maxamed Khadar Daahir Mooge | Xubin |
| 55 | Maxamed Xasan Siciid Maxamuud | Xubin |
| 56 | Maxamed Xuseen Jaamac Raanboo | Xubin |
| 57 | Maxamed Xuseen Maydhane Obsiiye | Xubin |
| 58 | Maxamuud Faarax Jaamac Maxamuud | Xubin |
| 59 | Maxamuud Saalax Cabdi Axmed | Xubin |
| 60 | Maxamuud Xayir Ducaale Diiriye | Xubin |
| 61 | Mubaarig Xuseen Maxamed (Xeel-Dheere | Xubin |
| 62 | Mubaarik Muuse Ismaaciil Xuseen | Xubin |

| | | |
|---|---|---|
| **63** | Mukhtaar Ibraahim Xaashi Cilmi | Xubin |
| **64** | Mukhtaar Xasan Maydane Shirdoon | Xubin |
| **65** | Mustafe Axmed Cabdilaahi Ismaaciil(Khayreeye) | Xubin |
| **66** | Nuur Cismaan Guuleed Warsame | Xubin |
| **67** | Nuuradiin Axmed Dayib Cabdiraxmaan | Xubin |
| **68** | Qaasim Aadan Saleebaan Cali | Xubin |
| **69** | Saalax Maxamed Diiriye Xujaale | Xubin |
| **70** | Saleebaan Axmed Carab Jaamac | Xubin |
| **71** | Saleebaan Diiriye Bare Cali | Xubin |
| **72** | Saleebaan Maxamed Faarax Geedi (Goox) | Xubin |
| **73** | Saleebaan Nuur Warsame Faarax (Food) | Xubin |
| **74** | Siciid Jaamac Xasan Maxamed | Xubin |
| **75** | Siciid Maxamed Ismaaciil Diiriye (Sokeeye) | Xubin |
| **76** | Xasan Axmed Cilmi Geelle (Xasan Kayse) | Xubin |
| **77** | Xasan Cumar Xasan Rooble (X.Ogaal) | Xubin |
| **78** | Xasan Saleebaan Dhuxul (Laabsaalax) | Xubin |
| **79** | Xuseen Aadan Cabdi Axmed | Xubin |
| **80** | Xuseen Ismaaciil Jaamac Xirsi (Budul) | Xubin |
| **81** | Yaasiin X. Maxamuud Xiir Faratoon | Xubin |
| **82** | Yaxye Cabdillaahi Aamiin Ismaaciil (Araarse) | Xubin |

## J. LIISKA QAAR KA MID AH SHAQAALAHA GOLAHA WAKIILADA

| A. | Xog-hayaha Guud iyo ku-xigeenka | |
|---|---|---|
| No. | **Magaca** | **Xilka** |
| 1 | Abdirisak Sa'ed Ayanle | Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada |
| 2 | Jamal Jama Hassan | Xog ku-xigeenka Golaha Wakiillada |
| B. | Agaasime Waaxeedyada | |
| No. | **Magaca** | **Xilka** |
| 1 | Awad Ali Mohamed | Ag/Waaxda Hadal Qoraalka iyo Daabacadaha |
| 2 | Abdinasir Osman Mahamoud | Agaasimaha Waaxda Qorsheynta iyo Tababarada |
| 3. | Abdilahi Abdi Adan | Ag/Waaxda Cilmi Baadhista iyo Shurucda |
| 4 | Farax Ibraahim Gamuute | Agaasimaha Waaxda Maamulka iyo Xisaabaadka |
| 5 | Hamse Mohamoud X. Muuse | Agaasimaha Waaxda Miisaaniyada G.Wakiilada |
| 6 | Ismahan Yusuf Ibrahim | Ag/Waaxda Xog & Guddiyada & Gobolada |
| 7 | Mahad Omer Sa'eed | Agaasimaha Waaxda Shaqaalaha |
| 8. | Mohamud Mohamed Osman | Ag/Waaxda Xusuus Dhowrka iyo Laybareeriga |
| 9 | Sa'ed Yasin Ismail | Ag/Waaxda Hab-maamuuska iyo Amiga |
| 10 | Sulieman Abdisitar Dubad | Ag/Waaxda Warbaahinta Tig iyo Xidh. D/waynaha |
| 11 | Maxamed Siciid Xuseen | Xisaabiyaha Golaha Wakiilada JSL G/W |
| C. | Agaasime ku xigeenada | |
| No. | Magaca | **Xilka** |
| 1 | Abdinasir Kayse Maxamuud | Ag/ku xigeenka Waaxda Cilmi Baadhisata |
| 2 | Abdiasiis Ibraahim Jaamac | Ag/ ku xigeenka warbaahinta, Xidh. D/waynaha |
| 3 | Nuur Diiriye Cabdillahi | Ag/ ku xigeenka Waaxda Shaqaalaha |
| 4 | Ridwan Abdillahi Abdi | Ag/ ku xigeenka Waaxda Guddiyada iyo Gobolada |
| 5 | Sahal Guuleed Xadi | Ag. Ku-Xigeenka W. H/oraalka iyo Daabacadaha |
| 6 | Xuseen Cabdi Jaamac | Ag/ku xigeen Waaxda hab-maamuuska iyo Amniga |
| 7 | Yuusuf Xabiib Xuseen | Ag/Ku-Xigeenka Xusuus Dhowrka iyo Laybareriga |
| D | Xoghaymaha Guddiyadda | |
| No. | **Magaca** | **Xilka** |
| 2 | Khadra Suber Nux | Xoghayaha 2aad ee Guddida Dabagalka |
| 3 | Abdirahman Ahmed Abdilahi | Xoghayaha 1aad ee Guddida Dhaqaalaha |
| 6 | Maxamed Jaamac Cabdi | Xoghayaha 2aad ee Guddida Arrimaha Guddida |
| 7 | Cabdirisaaq Maxamuud Siciid | Xoghayaha 1aad ee Guddida Arrimaha Dibedda |
| 8 | Fadxa C/laahi Jaamac | Xoghayaha 2aad ee Guddida Arrimaha Dibedda |

| | | |
|---|---|---|
| 9 | Ayanle Ahmed Abdi | Xoghayaha 1aad ee Guddida Joogtada ah |
| 10 | Shukri Ahmed Abdillahi | Xoghayaha 2aad ee Guddida Joogtada ah |
| 11 | Ali Mohamed Hussein | Xoghayaha 1aad ee Guddida Hawlaha Guud |
| 12 | Maxamed Xuseen Cilmi | Xoghayaha 2aad ee Guddida Hawlaha Guud |
| 13 | Cabdiladiif Axmed Maxamed | Xoghayaha 1aad ee Guddida shareecada |
| 14 | Ibraahim Maxamed Faarax | Xoghayaha 2aad ee Guddida shareecada |
| 16 | Cabdale Ciise Xasan | Xoghayaha 2aad ee Guddida Deegaaka |
| 17 | Caydiid Xiis Caydiid | Xoghayaha 1aad ee Guddida Arr. Bulshada |
| 18 | Cabdiwahab Maxamed Yuusuf | Xoghayaha 2aad ee Guddida Arrimaha |
| 19 | A/Rahman Jama Nur | Xoghayaha 1aad ee Guddida Caddaalada |
| 20 | Maxamed Axmed Cabdi | Xoghayaha 2aad ee Guddida Caddaalada |
| E. | La-taliyaasha shaqaalaha ku jira | |
| **No.** | **Magaca** | **Xilka** |
| 1 | Cabdiraxmaan Hirad Jaamac | La-taliye Sharci |
| 2 | A/risaq Muse Idle | La-taliye Arrimaha Bulshada |
| 3 | Fu'aad Jaamac Axmed | La-taliye Gudida Arrimaha Bulshada |
| 4 | Jaamac Cabdi Muxumed | La -taliye Sharcig ee Arrimaha Shareecada. |
| 5 | Mubarik Farah Warsame | La-talyaha Siysaasda (Policy Advisor) |
| 6 | Mustafe Mohamoud Hassan | La-Taliyaha Khayraadka dabiciga ah |
| 7 | Sa'ed Farah Hashi | La-taliyaha Mashaariicda |
| F | La-taliyaasha aan shaqaalaha ku jirin | |
| **No.** | **Magaca** | **Xilka** |
| 1 | Yuusuf Cismaan Cabdulle | La -taliyaha Afka iyo dhaqaanka G. W |
| 2 | Maxamed Cismaan Badal | La -taliyaha Afka iyo dhaqaanka G. W |
| 3 | Axmed Yuusuf Xuseen | La-taliyaha Gudidda Garsoorka, Cadaaladda |
| 4 | Xasan Maxamed Jaamac (X.xiis) | La- taliyaha Xidhiidhka Caalamiga ah |
| 5 | Cabdirisaaq Jamac Cilmi | La-taliyaha |
| 6 | Axmed Maxamed Xaashi | La-taliyaha Dhaqanka |
| 7 | Cismaan Axmed Maxmed | La-taliyaha maamulka iyo Xisaabaadka |
| 8 | Maxamed Cabdiraxmaan Ducale | La-taliyaha Luuqada Carabiga |
| 9 | Cabdillahi Cabdi Cawad | La-taliyaha Guddida Dhaqaalaah |
| 10 | Cabdirisaaq Maxamed Siciid | La- taliye Sharci |
| 11 | Mubarik Cabdi Ismaaciil | La-taliye Sharci |
| 12 | Khadar Maxamed Axmed xayd | La-taliye Sharci |

| | | |
|---|---|---|
| 13 | Rooda Yaasiin Cabdillaahi | La -taliye Gudidda Arrimaha Sharcig |
| 14 | Aadan Salaad Seed | La-taliye Sharci |
| 15 | Ibraahim Sh. Aadan Xuseen | La-taliyaha Xidhiidhka Dalalka Carabta |
| 16 | Olol Yaasiin Axmed | La-taliye Arrimaha Xidhiidhka Dibada |
| 17 | Maxamed Xuseen Faarax | La-taliye |
| 18 | Bile Jaamac Aadan | La-taliyaha Gud.ku-xigeenka 1aad |